**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD**

**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 14aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 18/10/2025* |


# XEERKA NIDAAMKA XUKUUMADDA IYO HAY'ADAHA MADAXBANNAAN
# XEER LR.71/2025


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**


*Sannadka 2025*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**جمهورية صوماليلاند**

**XAFIISKA MADAXWEYNAHA**
**OFFICE OF THE PRESIDENT**
**مكتب الرئيس**

**TIX: JSL/XW/WM/222-172/092025** **Taariikh: 17/09/2025**

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka wax-ka-beddelka iyo kaabista xeerka kala xadaynyta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addaha madaxa bannan ee Xeer. Lr. 71/2025**

| | |
|---|---|
| Markii aan arkay: | Qoddobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markii aan arkay: | Qodobka 38aad farqadiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markii aan arkay: | Qoddobka 75aad iyo 76aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markii aan helay: | Go'aanka Ansixinta Golaha Wakiillada (**Go'aan Lr; GW/KF-12/17/2025**) ee summaddiisu tahay Ref; **GW/G/12/378/2025**, kuna taariikhaysan **30/08/2025.** |

**<u>Waxa aan Soo-saaray.</u>**

Wareegtadan lagu faafinayo dhaqan-galka wax ka beddelka iyo kaabista nidaamka Xeerka kala xadaynta Xukuumadda iyo Hay'addaha madaxa-bannaan ee **Xeer Lr. 71/2025.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

**Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: - Go'aanka Ansaxinta Wax Ka Beddelka Iyo Kaabista Xeerka Kalaxadaynta Nidaamka Xukuumada Iyo Hay'adaha Madaxbannaan Xeer. Lr. 71/2025**

GOLAHA WAKIILLADU:

*MARKUU ARKAY: -* Qodobka 90aad, 94aad, 113aad, 114aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

*MARKUU ARKAY: -* Waajibaadka Dastuuriga ah ee ka saaran Golaha Wakiillada ansixinta Xeerarka lagu nidaaminayo dhismaha xukuumadda si waafawsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

*MARKUU ARKAY: -* Mabaadii'da iyo qaabdhismeedka guud ee wasaaradaha iyo hay'adaha xukuumadda JSL ee lagu jaangooyay xeerkan

*MARKUU ARKAY: -* In xeerarkii hore u jirey aanay ka turjumeyn dhismaha xukuumadda iyo qaabdhismeedkeeda guud.

*MARKUU ARKAY: -* Ahmiyadda ay leedahay kala xadaynta waajibaadka wasaaradaha kala duwan ee xukuumaddu in ay lafdhabar u yihiin qaranka

*MARKUU ARKAY: -* Warbixinta lifaaqa Guddida Garsoorka, Cadaaladda, Shuruucda iyo Xuquuqda Aadamaha ee Golaha iyo doodda mudanayaasha Golaha

*MARKUU ARKAY: -* Go'aanka Ansixinta Wax ka beddelka iyo Kaabista xeerka kala Xadaynta Nidaamka Xukuumada iyo Hay'adaha Madaxa Banaan **Xeer. Lr. 71/2025** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhaysnaa **16/08/2025** kalfadhigii **9aad** fadhigiisi **12aad.**

*MARKUU ARKAY: -* In Golaha Guurtidu wax-ka-bedel iyo kaabis aanu ku sameynin kuna ansixiyeen Lix afartan **(46)** Cod Wax Ka Beddelka Iyo Kaabista Xeerka Kalaxadaynta Nidaamka Xukuumada Iyo Hay'adaha Madaxbannaan **Xeer. Lr. 71/2025** Kuna tariikhaynaa **27/08/2025.**

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **48 cod oo** gacan taag ah ku ansaxiyay Wax Ka Beddelka Iyo Kaabista Xeerka Kalaxadaynta Nidaamka Xukuumada Iyo Hay'adaha Madaxbannaan **Xeer. Lr. 71/2025**

ALLAA MAHAD LEH

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

**Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Jamhuuriyadda Somaliland

## GOLAHA WAKIILLADU:

*MARKUU ARKAY:* - Qodobka $90^{aad}$, $94^{aad}$, 113aad, $114^{aad}$, $77^{aad}$ iyo $78^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

*MARKUU ARKAY:* - Waajibaadka Dastuuriga ah ee ka saaran Golaha Wakiillada ansixinta Xeerarka lagu nidaaminayo dhismaha xukuumadda si waafawsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

*MARKUU ARKAY:* - Mabaadii'da iyo qaabdhismeedka guud ee wasaaradaha iyo hay'adaha xukuumadda JSL ee lagu jaangooyay xeerkan

*MARKUU ARKAY:* - In xeerarkii hore u jirey aanay ka turjumeyn dhismaha xukuumadda iyo qaabdhismeedkeeda guud.

*MARKUU ARKAY:* - Ahmiyadda ay leedahay kala xadaynta waajibaadka wasaaradaha kala duwan ee xukuumaddu in ay lafdhabar u yihiin qaranka

*MARKUU ARKAY:* - Warbixinta lifaaqa Guddida Garsoorka, Cadaaladda, Shuruucda iyo Xuquuqda Aadamaha ee Golaha iyo doodda mudanayaasha Golaha

**Wuxuu Ansixiyay**

**Wax ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Kalaxadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxabannaan Xeer.Lr.71/2025**



XAFIISKA QARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA KOOWAAD
## MABAADII'DA GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxbannaan Xeer Lr.71/2025

### Qodobka 2aad
### Erey-bixin

Marka aan xeerku si kale u sheegin, ereyadan waxa loola jeedaa: -
Marka aan xeerku si kale u sheegin, ereyadan waxa loola jeedaa: -

| | |
|---|---|
| Xukuuumad: - | Waxa loola jeedaa Waaxda Fulinta oo ka kooban, Madaxweyne, Madaxwayne Kuxigeen iyo Golaha Wasiirrada. |
| Hay'adaha Xukuumadda: - | Iyada oo laga duulayo Qodobka 113aad ee Dastuurka, hay'adaha waxa loola jeedaa guddiyada (komishannada), xafiisyada iyo mu'asasad kasta oo kale oo fulineed oo aan ahayn Golaha Wasiirrada, wakaaladaha, shirkadaha iyo mashaariicda. |
| Wasaaradda: - | Waxaa looga jeedaa mid ka mida hay'adaha xukuumadeed oo uu madax ka yahay wasiir, isla markaana loo aasaasay si waafaqsan xeerka. |
| Awoodda soo saarista amar iyo go'aanno: - | Waxa loola jeedaa awoodda sarkaal sare u leeyahay inuu soo saaro amarro iyo go'aanno sharcigu awood u siiyay soo saaristeeda. |
| Shirkadaha Xukuumaddu leedahay: - | Waxa loola jeedaa shirkadda ganacsi ee xukuumaddu leedahay saamiga ugu badan. |

### Qodobka 3aad
### Dabbaqaadda Xeerka

Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa xukuumadda, hay'adaheeda, wakaaladaheeda, shirkadaha ay leedahay ama wax ku leedahay iyo waaxaha la xidhiidha xukuumadda.

## Qodobka 4^aad^

## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddada xeerkani waa:

1. Dejinta sharci saldhig u ah hay'adaha xukuumadda dhexe.
2. Xaddidaadda xilka, waajibaadka, awoodaha iyo shaqada hay'adaha xukuumadda dhexe.
3. Kala xadaynta hawlaha iyo xilalka laamaha xukuumadda dhexe iyo isku xidhkooda.
4. In la gaadho tayayn dhammaystiran oo la xidhiidha guud ahaan waxqabadka xukuumadda.
5. In la xaqiijiyo habsami u socodka adeegyada bulshada.
6. In si cad loo iftiimiyo, lana dhaqangeliyo, xadka u dheexeeya xilalka maamul iyo siyaasadeed ee haga, gaadhsiiyana adeegyada aasaasiga ah qaybaheeda kala duwan ee bulshada.

## Qodobka 5^aad^

## Mabaadii'da Xeerka

Mabaadii'da hagaysa xeerku waa:

1. In shareecada Islaamku sal u tahay xeerarka Somaliland.
2. In Somaliland tahay dal dimuqraaddi ah.
3. In ka sokow Ilaahay, dadku leeyahay dawladnimada, dhammaan hay'adaha, xukuumadduna iyaga oo dadka ka wakiil ah u fulinayaan awoodda xukuumadda si xeerarka waafaqsan.
4. Ixtiraamka xuquuqda dadka iyo sharafta ruux walba.
5. In shacabku leeyahay awoodda.
6. In dawladaha hoose leeyihiin maamul hoosaad ku xadaysan deegaan.
7. In qaabdhismeedka maamul ee dalku u qaybsamo, gobollo, degmooyin, tuulooyin, qaabdhismeedka xukuumadduna u qaybsamo wasaaraddo, hay'ado, wakaalado iyo shirkado xukuumaddu leedahay ama wax ku leedahay.
8. Xaqa shacabka iyo ururrada metelaa u leeyihiin ka qayb qaadashada qaabaynta siyaasadda, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada, iyada oo xukuumaddu hirgelinayso xeerar iyo hannaan ay kaga talo bixin karaan go'aan qaadashada saamaynaya noloshooda iyo aayahooda.
9. Dhismaha xukuumaddu waxa uu u taagan yahay dhawridda nafta, maalka iyo sharafta dadka, iyada oo loogu adeegayo si siman oo aan kala doorasho lahayn.
10. In xeerarka dalku ku salaysnaadaan Dastuurka dalka JSL.

## Qodobka 6^aad^

## Xilka adeegga Xafiis Xukuumadeed

Xafiis xukuumadeed, waxa uu u aasaasan yahay adeegga danta guud. Masuul iyo shaqaale xukuumadeed oo kastana waxa ku waajib ah, in ay u gutaan xilkooda oo ugu shaqeeyaan dalka iyo dadka si ay ku dheehantahay xilkasnimo, daacadnimo, sharaf, karti, hufnaan iyo sinnaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA — FAAFINTA RASMIGA AH — OFFICIAL GAZETTE — SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 7aad
## Shaambadaha

1. Shaambadda dawladda waxa lagu dhufanayaa qoraallada uu saxeexo Madaxweynuhu, waxaanay oolaysaa Xafiiska Madaxweynaha.
2. Wasaaradaha, hay'adaha kala duwan ee xukuumadda, wakaaladaha iyo shirkaduhu waxay yeelanayaan shaambado ugaar ah sida ay u ekaanayaan waxa go'aankeeda leh wasiirka ama masuulka haya'dda.
3. Wasaaradaha, hay'adaha kala duwan ee xukuumadda, wakaaladaha iyo shirkaduhu waxay yeelanayaan hal shaambad oo keliya oo lagu haynayo xafiiska xusuusdhawrka ee hay'adda/wasaaradda ama wakaaladda.

## Qodobka 8aad
## Fasiraadda Xeerarka Iyo Qoraallada Rasmiga ah

1. Fasiraadda xeerarka iyo qoraallada rasmiga ah waxa aasaas u ah nuqulka soomaaliga ah, waxaana loo raacayaa fasiraaddooda si waafaqsan shareecada Islaamka, Dastuurka iyo shuruucda dalka.
2. Haddii isqabad sharci ka yimaaddo fasiraadda xeerkan waxa fasiraysa Maxkamadda Sare ee dastuuriga ah.

## Qodobka 9aad
## Maalmaha u Gaar Ah Munaasibad

Madaxweynuhu wuxuu u astayn karaa munaasibad maalin u gaar ah.

## Qodobka 10aad
## Tirsiga Muddooyinka

Tirsiga taariikheed waxa laga raacayaa taariiikhda Islaamka ee Hijriyada iyo taariikhda miilaadiga oo ka kooban:

1. Sannad oo ka kooban laba iyo toban bilood.
2. Bil oo ka kooban soddon maalmood, haddaan la raacin tuse taariikheed oo tilmaamaya wax ka duwan tirada.
3. Toddobaad oo ka kooban toddoba maalmood.
4. Saacad oo ka kooban lixdan daqiiqadood (60 miridh).
5. Daqiiqad (miridh) oo ka kooban lixdan ilbidhiqsi.

## Qodobka 11aad
## Halbeegyada Cabbiraadda

Halbeegga cabbiraadda rasmiga ah ee dalka ka dhaqangalka ahi waa, mile, kiiloomitir, mitir, mitir labajibbaaran, mitir saddexjibbaaran, garaam, kiiloogaraam, litir, galaan, tonne, waar iyo litir, digree, hiktar iyo saacadaha.

# QAYBTA LABAAD XUKUUMADDA



XAFIISKA QARYAGAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Qodobka 12aad**
**Xukuumadda**

1. Nidaamka dawladeed ee dalku waa mid u qaybsan saddex waaxood oo kala ah Waaxda Xeerdejinta (Baarlammaanka), Garsoorka iyo Waaxda Fulinta.
2. Waaxda Fulinta oo sidoo kale loo yaqaan xukuumadda, waxay ka kooban tahay, Madaxwayne, Madaxwayne Kuxigeen iyo Golaha Wasiirrada.
3. Awoodda Waaxda Fulintana waxa ka masuul ah Madaxweynaha.
4. Dalku wuxuu leeyahay Madaxweyne Kuxigeen, kaas oo Madaxweynaha kala mid ah muddada xilka, habka doorashada iyo xaaladaha bannaan Madaxweynaha.
5. Madaxwaynaha iyo sii hayaha jagada Madaxwayne Kuxigeenkuna isku hal mar dalka kama maqnaan karaan.

**Qodobka 13aad**
**Madaxweynaha**

1. Madaxweynuhu waa madaxa dawladda iyo xukuumadda, waana astaanta midnimada muwaaddiniina Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Iyada oo aan waxba loo dhimayn xilka, waajibaadka iyo awoodaha dastuuriga ah ee Madaxweynaha iyo kuwa ay dhigeen xeerarka kale ee dalku, Madaxweynaha Somaliland wuxuu leeyahay awoodaha ku dhigan qodobbada soo socda.

**Qodobka 14aad**
**Awoodda Soo Saaridda Amarro iyo Go'aamo**

Madaxweynuhu wuxuu soo saari karaa amarrada, xeerarka iyo wareegtooyinka soo socda:

1. **Xeer Madaxweyne** oo ah xeerarka Dastuurku ama uu xeer u igmaday (xilsaaray) soo saaristooda.
2. **Amar maamul** oo ah amarrada maamul ee Madaxweynaha ee la xidhiidha tallaabooyinka uu hawlgal gaar ah ku amrayo.
3. **Wareegto maamul** (memorandum circulars) tallaabooyinka Madaxweynaha ee la xidhiidha arrimaha maamulka gudaha hay'adaha xukuumadda, kuwaas oo Madaxweynaha ula muuqata in lagu boorriyo dhammaan ama qayb ka mid ah hay'adaha xukuumadda, waxaana lagu soo saarayaa wareegto maamul.
4. **Amarro ciidan:** oo ah amarrada Madaxweynuhu soo saaro isaga oo ah hoggaamiyaha ciidamada.

**Qodobka 15aad**
**Awoodaha Magacaabista**

Madaxweynuhu wuxuu u adeegsanayaa awoodda magacaabista saraakiisha sare ee xukuumadda sida uu jideeyey Dastuurku iyo xeerarka kale ee dalku.

**Qodobka 16aad**
**Magacaabista Xubnaha Golaha Wasiirrada**

Madaxweynuhu wuxuu bilawga muddada xilkiisa magacaabayaa xubnaha Golihiisa Wasiirrada, isaga oo u gudbinaya Golaha Wakiillada, si ay u ansixiyaan,

**Qodobka 17aad**
**Magacaabista Kumeelgaadhka ah**



XAFIISKA QARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

1. Marka masuulkii xilka hayey, sababo caafimaad darteed ku maqnaado ama si kalaba xilka u gudan kari waayey ama jagadu bannaanaatay, Madaxweynuhu wuxuu si kumeelgaadh ah u magacaabi karaa sarkaal xukuumadeed ama qof kasta oo ku munaasib ah.
2. Qofka xilka loo magacaabay wuxuu xaq u yeelanayaa mushahar, marka aanu markii horaba ahayn shaqaale xukuumadeed ama masuul sare, haddii uu ahaase shaqaale ama masuul wuxuu yeelanayaa gunnaxileed, waxaana xeer Madaxweyne loogu samaynayaa kab.
3. Muddada magacaabista kumeelgaadhnimadu sinnaba uma dhaafi karto saddex bilood.

## Qodobka 18aad
## Awoodaha Xadaynta Shaqada Xukuumadda

1. Iyada oo aan la eegayn xilka Iyo waajibaadyada wasaaradaha ee ku xusan xeerkan, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu awood u leeyahay inuu Xeer Madaxweyne ugu kala xadeeyo ama ugu kala qoondeeyo wasaaradaha iyo hay'adaha xukuumadda shaqooyinkooda, isagoo ka duulaya arrimaha ay ka mid yihiin;

b) Muhiimadda shaqadu u leedahay xukuumadda, sida laysugu xidhayo iyada oo la tixgelinayo nooceeda.

t) Baahida loo qabo ka hortagga, habacsanaanta iyo kaladaadsanaanta ku timaadda shaqada iyo hay'adaha xukuumadda

j) Ka hortagidda isdulfuulka xilka iyo waajibaadka haya'daha xukuumadda

x) Xaqiijinta in xilalka laysu raaciyey hab la maamuli karo oo ku dhisan xajmiga (culayska ama baaxadda) hawsha.

2. Madaxweynuhu marka uu u kala qoondaynayo wasaaradaha Iyo hay'adaha Xukuumadda shaqooyinka, waxa uu qaadi karaa tallaabooyinkan:

b) Waxa uu kordhin karaa tirada wasaaradaha ku xusan xeerkan, si uu u soo dhiso wasaaradaha lagama maarmaanka u ah xil gudashada xukuumadda.

t) Waxa uu yarayn karaa tirada wasaaradaha ku xusan xeerkan isaga oo tixgelinaya sida ay shaqooyinka wasaaraduhu isu raacaan.

j) Waxa uu shaqooyin kale ku soo kordhin karaa wasaaradaha, si adeegyada ay bixiyaan hay'adaha xukuumaddu loo waafajiyo baahiyaha bulshada iyo isbeddelka ku iman kara shaqooyinka.

x) Waxa uu qayb ka mid ah shaqooyinka wasaarad ama in ka badan u wareejin karaa wasaarad kale ama ka dhigi karaa wasaarad cusub, iyada oo laga duulayo siyaasadda guud ee xukuumadda.

kh) Waxa uu hay'ad dawladeed u dalacsiin karaa inay noqoto wasaarad, sidoo kalana waxa uu wasaarad ka dhigi karaa inay noqoto hay'ad dawladeed, isagoo ka duulaya danta qaranka iyo muhiimadda shaqadu u leedahay xukuumadda.

## Qodobka 19aad
## Awoodaha Madaxwayne Kuxigeenka

Madaxweyne Kuxigeenka JSL waa Guddoomiye kuxigeenka Golaha Wasiirrada waxaanu u xilsaaran yahay:

1. Kusimidda xilka Madaxweynaha, marka uu Madaxweynuhu maqan yahay ama uu buko.
2. Gudashada hawlaha uu Madaxweynuhu u igmado.
3. Qabashada xilka Madaxweynenimo marka ay jagadu bannaanaato Dastuurka.



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Qodobka 20aad**
**Golaha Wasiirrada**

1. Golaha Wasiiradu waxay Madaxweynaha ka kaal maynayaan fulinta xilkiisa, iyaga oo wadajir u go'aamin doona siyaasadda guud, qorshayaasha iyo barnaamijyada iyo xukuumadda.
2. Xubnaha Golaha Wasiirrada waxa ka reebban shaqo kale oo ka baxsan tan Xukuumadda.
3. Xubin kasta oo ka tirsan Golaha Wasiirrada wuxuu u xilsaaranyahay in uu guto masuuliyadda Madaxweynuhu u igmaday, isagoo ka duulaya Dastuurka Qaranka, xeerarka dalka, siyaasadda xukuumadda iyo tilmaamaha Madaxweynaha iyo Dastuurka Qaranka.
4. Qofna looma magacaabi karo xubin Golaha Wasiirrada, marka aanu buuxin shuruudaha ku xidhan xubnaha loo dooranayo Golaha Wakiillada.
5. Waxa loo xilsaari karaa hal wasaarad ama in ka badan.
6. Lama xidhi karo xubin ka tirsan Golaha Wasiirrada, marka aan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi ciqaabtiisu gaadhayso saddex sanno ama aanu Madaxweynuhu ka qaadin dhawrsanaanta, isaga oo ku qancay soo jeedin uu u soo bandhigay Xeer ilaaliyaha Guud.

**Qodobka 21aad**
**Wasiirrada**

Wasiirradu waxa ay u xilsaaran yihiin dejinta siyaasadda, meelmarinta xilgudashada iyo waajibaadka wasaaradahooda, hagiddooda, metelaaddooda iyo kormeeridda Agaasinka Guud ee Wasaaradda.

**Qodobka 22aad**
**Xilka, Waajibaadka iyo Awoodaha Wasiirka**

Isaga oo wasaaraddiisa uga wakiil ah Madaxweynaha, xilka iyo waajibaadka wasiirku waa:

B) Xilka iyo Waajibaadka Wasiirka

i. Hoggaamiyaha guud ee siyaasadda lagu hogaaminayo wasaaradda.
ii. Iskuxidhka wasaaradda iyo hay'adaha kale ee xukuumadda.
iii. Kalatalinta Madaxweynaha soo saaridda amarada fulinta, ogaysiisyada iyo xeer arrimaha hoosaadyada, kale ee Madaxweynahu xeer u xilsaaray ee la xidhiidha arrimo hoosyimaadda wasaaraddiisa.
iv. Dejinta siyaasadda iyo halbeegyada xilgudashada wasaaradda isaga oo ka duulaya siyaasadda guud ee xukuumadda u dejisan, kuna salaysan ka midho dhallinta qorshaha horumarineed ee saamaynaya dhinacyada maamulka iyo maaraynta guud, hiigsashada horumarin dhaqaale salballaadhan, hagaajinta adeegyada bulshada ee daruuriga ah, horumarinta xidhiidhada caalamiga ah iyo suggidda, adkaynta midnimada ummadda ee ku wajahan jiritaanka dawladnimada Somaliland ee u dejisan xisbiga xukuumadda ee soo saaray Madaxweynaha.
v. Dejinta qawaacidda (Nidaamka) lagama maarmaanka u ah xilgudashadooda oo ay ka mid yihiin fulinta siyaasadda iyo ujeeddooyinka wasaaradda, qorshaha iyo maamul wanaagga.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

vi. Hagidda iyo ku hubinta maamulka wasaaradda la jaanqaadka siyaasadda guud ee xukuumadda ee ku wajahan himillooyinka loo dejiyey wasaaradda. **vii.** Hirgelinta xeerarka la xidhiidha xilka wasaaradda,

viii. Isticmaalka awoodaha wasaaraddu ku leedahay hay'adaha, wakaaladaha iyo shirkadaha wasaaradda hoos yimaadda si waafaqsan xeerka.

vii. Gudashada xil kasta oo xeer u jideeyay.

viii. Dejinta hab iyo hannaan si xillileh loogu qiimaynayo xil gudashada wasaaradda, kaas oo uu sannadkiiba mar Madaxweynaha hor dhigayo.

ix. U gudbinta ku talagalka miisaaniyadda wasaaradddiisa Madaxweynaha isaga oo u marinaya wasaaradda maaliyadda ku talagalka kharashka wasaaradda ee sannad maaliyadeedka dambe isaga oo ka duulaya warbixinada, hay'addaha, wakaaladdaha iyo mas'uuliyiinta hoos yimaada Wasaaradda.

x. Saxeexidda waarannada guud iyo mashaariicda.

xiii. Magacaabista iyo isku beddelka agaasime waaxeedyada markuu la tashado Agaasimaha Guud.

xiv. Iyada oo ay ka reebban tahay soo saarista amarro xanbaarsan ciqaabo haddaan xeer awood u siin, wuxuu soo saari karaa;

T) Awoodaha wasiirku waa:

i. In uu u igman karo qayb ka mid ah xilkiisa saraakiisha ama hawlwadeennada hoos yimaadda si xeerka waafaqsan.

ii. Iyada oo ay ka reebban tahay soo saarista amarro xambaarsan ciqaab, haddaan xeer awood u siin, wuxuu soo saari karaa: -

J) Wareegto wasiir: oo ah qoraallo rasmi ah oo wasiirradu ku dhaqangeliyaan siyaasadda xukuumadda, isla markaana lagu tayaynayo shaqada iyo xilgudashada.

X). Amarro wasiir: oo ah qoraallo rasmiya oo si gaara loogu socodsiiyey cid gaar ah, isla markaana la xidhiidha arrin khaas ah.

ii. Wasiirku wuxuu ku leeyahay hay'adaha, wakaaladdaha ama shirkadaha hoos yimaadda kormeer taas oo ay hagayaan;

b. Dhiirigelin iyo kor u qaadid la xidhiidha xilkooda, iyada oo la siinayo fursad intaan wasiirku isticmaalin awooddiisa.

x. Iyada oo aan waxba loo dhimayn awoodaha, khibradda aqooneed ee xeerku siiyey hay'adaha kale ee xukuumadda waxa kormeerka loo raacayaa sida xeerku dhigay.

kh. Iyada oo aan waxba loo dhimayn kaalinta wasaaraddu ku leedahay hay'adaha, wakaladaha ama shirkadaha, haddana awoodda wasaaradda waxa loo raacayaa si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 23[aad]

## Awoodaha iyo Waajibaadka Wasiirudawlayaasha

Xilka iyo Waajibaadka Wasiirudawluhu waa:

1) In uu ka madax noqdo waaxda ama qaybta wasiirku u xilsaaro ee muhiimka u ah iskuxidhka arrimaha siyaasadda guud ee wada shaqaynta hay'adaha wasaaradaha iyo laamaha kale ee dawladda si waafaqsan higsashada qorshaha guud ee xukuumadda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA ... OFFICIAL GAZETTE ... SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Inuu ka caawiyo, kalana taliyo wasiirka, fulinta iyo meel marinta hawlaha wasaaradda iyo himillooyinkeeda.
3) In uu ka gacansiiyo wasiirka hawl kasta oo la xidhiidha hawlaha wasaaradda si ay u muuqato in wasaaraddu cagta ku hayso himillooyinka horumarineed ee loo igmaday.
4) In uu si ku meelgaadh ah u fuliyo xilka wasiirka marka uu maqan yahay ama gudan kari waayo xilkiisa ama jagada u banaanaato haddaan si kale oo xeer u jideeyey.
5) Marka ay jiraan in ka badan hal wasiirudawle, haddaan Madaxweynuhu midkood si gaara ugu xilsaarin xilka wasaaradda, wuxuu wasiirku mid kood u sii xilsaari karaa sii wadidda hawsha wasaaradda, markuu maqan yahay.
6) Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xil saaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 24[aad]
## Xilka iyo Waajibaadka Wasiir Kuxigeenka

Wasiir kuxigeenku wuxuu:

1. Leeyahay xilka iyo waajibaadka wasiirudawlaha marka aan wasaaraddu lahayn wasiirudawle.
2. Ka caawiyo wasiirka hawlaha iyo shaqada wasaaradda In uu qabto wixii uu u xilsaaro wasiirku.
3. In uu ka madax noqon karo qayb ama waax marka wasiirku u igmado.
4. In uu qabto hawshii kale ee wasiirku u igmado.

Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 25[aad]
## Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud

Agaasimaha Guud oo ah madaxa maamul ee Wasaaraddiisa oo uu magacaabidiisa iyo xil ka qaadistiisa uu Madaxwaynuhu leeyahay xilkiisa iyo waajibaadkiisu waa

1. Fulinta barnaamijyada shaqo maalmeedka wasaaraddiisa.
2. Dabagalka iyo qiimaynta shaqada, shaqaalaha iyo madaxda waaxyaha iyada oo la raacayo Xeerka Shaqaalaha Dawladda
3. Xidhiidhinta Xarunta iyo Gobollada.
4. U soo gudbinta wasiirka warbixinno ku saabsan halka shaqada wasaaraddu marayso.
5. Xidhiidhinta iyo dabagalka hawlaha horumarineed ee wasaaradda.
6. Diyaarinta qorshaha wasaaraddiisa.
7. Ka qaybgelidda shirarka farsamo ee heer caalami ee loo xilsaaro.
8. Kor u qaadista sawirka ama muuqaalka hay'addiisa.
9. Diyaarinta iyo iskudubaridka miisaaniyadda wasaaraddiisa isagoo/iyadoo la xidhiidhay, agaasimayaasha waaxaha, saraakiisha gobollada/degmooyinka ee sar sare iyo dadweynaha wasaaraddu u adeegto marka ay lagama maarmaan noqoto si uu ugu gudbiyo wasiirka.
10. Korjoogtaynta iyo hubinta isu dheelitirka dakhliga iyo kharashaadka.
11. Soo saarista xisaab xidh sannadeedka.
12. Qabashada shirarka shaqaalaha wasaaradda.
13. Kormeerka waaxyaha iyo soo saaritaanka dhaliilaha shaqada iyo u soo gudbinta wasiirka xubnaha mutaystay.
14. Xidhiidhiyaa/ xidhiidhisaa hawlaha shaqo ee toddobaadlaha ah.
15. Hawlgelinta shaqaalaha iyo hubinta hawl gudashadooda iyo wixii kale ee xeer u xilsaaro.
16. Hirgelinta nidaamka diiwaangelinta waxqabadka shaqaalaha iyo joogtaynta ka warbixintooda
17. Hawgelinta iyo hagidda gudiyada wasaaraddiisa ee agaasinkiisa hoos yimaadda.



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

18. Qorshaynta iyo diyaarinta taboabarrada shaqaalaha.
19. Dersidda baahida shaqaale ee wasaaradda iyo soojeedinta kordhintooda.
20. Soojeedinta magacaabista iyo iskubeddelka agaasime waaxeedyada.
21. Kharashgaraynta kharaashaadka ku jira miisaaniyadda iyo mashaariicda.
22. Dejinta halbeegga waxqabad iyo kala sarraynta waxqabadka waaxyaha si loo joogteeyo abaalmarinta shaqaalaha.
23. Dejinta halbeegga shaqawanaagga madaxda waaxyaha iyo shaqaalaha.
24. Dejinta halbeegga waxqabadka iyo kala sareynta waxqabadka waaxyaha si loo joogteeyo abaalmarinta shaqaalaha
25. Ka qaybgelidda shirarka farsamo ee heer caalami ah.
26. Ka qaybgelidda dejinta qorshaha qaranka isagoo ka wakiil ah wasaaraddiisa
27. Gudoomintia gudida anshaxmarinta shaqaalaha wasaaradda.
28. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

**Qodobka 26aad**
**Ujeeddooyinka Wasaaradaha**

1. Xukuumaddu waxay yeelanaysaa wasaaraddaha laga ma maarmaanka u ah xilgudashadeeda.
2. Wasaaradaha waxa loo qaabaynayaa islamarkaana loo hagayaa si ay u qorsheyn karaan una fulin karaan xilkooda, iyada oo laga duulayo siyaasadda guud ee xukuumadda.

**Qodobka 27aad**
**Wasaaradda Madaxtooyada**

Xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Madaxtooyadu waa:

1. Diyaarinta, iskudubarididda, ururrinta iyo qorshaynta hawlaha madaxtooyada,
2. Diyaarinta warbixinnada iyo ururrinta xogta ka timaadda laamaha xukuumadd.
3. Ka caawinta Madaxweynaha iyo Golaha Wasiirrada si ay u gutaan waajibaadkooda sida ugu wanaagsan,
4. Inay ilaaliso, maamusho, horumarisana madxafyada, goobaha dalxiiska iyo aasaarta qadiimiga ah ee dalka.
5. Hubinta inay wadashaqeeyaan, si joogto ahna isagawarhayaan lataliyayaasha Madaxweynaha.
6. Maamulidda arrimaha hab maamuuska ee Madaxweynaha.
7. Diyaarinta arrimaha khuseeya amniga iyo ilaalada Madaxweynaha iyo amniga madaxtooyada.
8. Taageeridda iyo gacansiinta guddiyada uu Madaxweynuhu magacaabay si ay u awooddaan inay shaqadooda u qabsadaan si tayo leh.
9. Hubinta iyo la socodka xisaabta iyo kharashaadka Madaxtooyada ee aanu si gaar ah u maamulin Madaxwaynuhu.
10. In uu ka caawiyo Golaha Wasiirrada iyo guddiyada hoos imanaya arrimaha maamulka iyo xoghaynta.
11. Ururinta xogaha, go'aamada iyo warbixinaha ka soo baxa shirarka Golaha Wasiirrada Xukuumadda Somaliland.
12. Diyaarinta ajandayaasha kulannada Golaha Wasiirrada.
13. Dejinta Miisaaniyadda Madaxtooyada JSL.
14. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

**Qodobka 28aad**



XAFIISKA GARYAGAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Wasaaradda Horumarinta Beeraha**

Iyada oo fulinaysa xilka xukuumadda ka saaran dhiirigelinta waxsoosaarka beeraha, xabagta iyo faleenka waxa Wasaaradda Beeraha xilkeeda iyo waajibaadkeedu yahay:

1. In ay curiso sharciyadda, siyaasadaha iyo qorshayaasha lagu horumarinaayo waxsoosaarka beeraha dalka.
2. In ay u hawlgasho, soona bandhigto qorshaha xukuumadda ee lagu gaadhi karo isku filaanshiiyo xaga cuntada ah.
3. In ay kor u qaaddo xirfadda beeralayda iyo ku tababaridda hababka casriga ah ee wax loo beerto, si loo kordhiyo loona horumariyo waxsoosaarka beeraha.
4. In ay ka hawl gasho kala xadaynta dhul beereedyada iyo dhuldaaqsimeedyada iyada oo la kaashanaysa hay'adaha kale ee dawladda ee ay khusayso.
5. In ay dhiirrigaliso horumarka iyo isticmaalka tiknoolajiga ku habboon dhulbeereedka.
6. Inay kor u qaaddo tignoolajiyadda fidinta beeraha, kuna tababarto beeralayda hababka iyo farsamooyinka casriga ah ee ka caawinaya horumarinta waxsoosaarka beeraha.
7. In ay raadiso una fududayso beeralayda suuqgeynta waxsoosaarka ka yimaadda beeraha dalka.
8. In ay samayso habab lagu ilaaliyo laguna maamulo siidhka (shinnida abuurka)
9. In ay ka hortagto cudurrada ku dhaca dalagga beeraha.
10. In ay ilaaliso saamaynta raadka taban ee isticmaalka kiimikalka loo isticmaalo beeraha.
11. In ay joogtayso ilaalinta siidhka iyo bixinta ruqsadihiisa
12. In ay dib u habayso fidinta macaahidda (dugsiyada) tababarrada iyo cilmibaadhista beeraha.
13. In ay bixiso taageero farsamo iyo mid tababar oo la siiyo beeraleyda si loo dhiso tayadooda, isla markaana ay u gutaan waajibaadkooda ka saaran beeraha.
14. In ay bixiso shahaadada lahaanshaha beeraha.
15. In ay ka hortagto nabaadguurka ciidda beeraha.
16. In ay samayso la dagaalanka ayaxa iyo cayayaanka waxyeeleeya beeraha.
17. In ay abuurto beero tijaabo iyo cilmibaadhiseed.
18. In ay soo saarto calafka xoolaha iyadoo la kaashanaysa hay'adaha kale ee dawladda.
19. In ay xakamayso cudurrada kala duwan ee ku dhaca dalagyada kala duwan ee la beerto.
20. In ay dhisto iskaashatooyinka beeralayda iyo gacan siintooda si ay uga qayb qaataan hormarinta wax soo saarka beeraha.
21. In ay diyaariso dhul-beereedyo dawladdu leedahay oo la beero, si dalku u gaadho isku filaansho dhinaca cuntada ah.
22. In ay kormeerto maamushana beeraha waxsoosaar ee dawladdu leedahay.
23. In ay deristo meel marisana hindisayaasha la xidhiidha horumarinta beeraha iyo waxsoosaarka dalka.
24. Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalka.

**Qodobka 29[aad]**

**Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Iyada oo xukuumadda xil ka saaran yahay amniga dalka iyo dadka, xilka iyo waajibaadka Wasaaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amnigu waa:

1. Curinta iyo diyaarinta siyaasadaha, xeerarka iyo qorshayaasha lagu maamulayo arrimaha amniga
2. Korjoogtaynta iyo la xisaabtanka maamulka guud ee Ciidanka Booliska, Ciidanka Ilaalada Xeebaha, Ciidanka Socdaalka iyo Ciidanka Dabdemiska, si waafaqsan xeerarka gaarka ah ee ciidamadaas.
3. Soo saaridda xeernidaamiyayaasha lagu dhaqangelinayo xeerarka ciidamada amniga gudaha ee hoos yimaadda wasaaradda.
4. Diyaarinta istiraajiyadda guud ee horumarinta ciidamada amniga gudaha ee hoos yimaadda wasaaradda.
5. Horumarinta iyo nidaaminta aqoonta, xirfadda, anshaxa iyo dhexdhexaadnimada ciidammada amniga gudaha;
6. Ilaalinta amarka iyo kaladanbaynta iyada oo adeegsanaysa ciidammada amniga gudaha;
7. Sugidda ammaanka muwaaddiniinta iyo anshaxa guud, si waafaqsan xeerarka.
8. Hubinta xasilloonida iyo ammaanka muwaaddiniinta iyada oo isku xidhaysa lana kaashanaysa laamaha amniga iyo ha'yadaha xukuumadda.
9. Ilaalinta amniga guud ee dalka iyo ka hortagga khatar iyo xasilloonidarro ka dhalata gudaha dalka
10. Kahortagga wixii hurinaya colaadaha, nacaybka iyo ladagaalanka dambiyada iyo asbaabaha keena.
11. Isku xidhka iyo isu duwidda hay'adaha amniga gudaha.
12. Ilaalinta marinada laga soo galo JSL ee xaga cirka, badda iyo dhulka
13. Qaadista tallaabooyinka ammaanka ee muhiimka u ah ilaalinta diblomaasiyiinta iyo wufuudda booqashada ku jooga dalka, xarumaha dibloomaasiyiinta, hay'adaha iyo ururada caalamiga ah.
14. Bixinta adeegga ammaanka xafladaha, dabaaldegyada iyo dhacdooyinka caamka ah.
15. Ka hortagidda daroogooyinka iyo waxyaalaha kale ee maandooriyayaasha ah.
16. Bixinta ruqsadaha dhoofinta, soodejinta iyo haysashada hubka fudud iyo walxaha qarxa, si waafaqsan Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud.
17. Korjoogtaynta iyo laxisaabtanka dhammaan hay'adaha amniga gudah.;
18. Kormeerka iyo maamulka guddoomiyayaasha, guddoomiye kuxigeennada iyo xoghayayaasha gobollada dalka.
19. Magacaabidda iyo xilkaqaadista xoghayaha fulinta ee gobollada dalka.
20. Aqoonsiga iyo ansixinta cuqaasha iyo madaxdhaqameedka loo caleemo saaray, si waafasan xeerka madaxdhaqameedka.
21. Diiwaangelinta, maamulidda iyo siinta kaadhka aqoonsiga madaxdhaqameedka ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amnigu ansixiso.
22. Sugidda iyo aqoonsiga muwaadinnimada iyo bixinta kaadhka aqoonsiga muwaadinka kaddib marka wasaaradda laga soo codsado ama laga soo diiwaangeliyo dawladaha hoose ee dalka, iyadoo adeegsanaysa cuqaasha ka diiwaangashan wasaaradda.
23. Ilaalinta iyo xafidaadda xogta kaadhka aqoonsiga ee muwaaddiniinta.

24. Hirgelinta xeerarka maamulaya bixinta baasaaboorrada iyo qoraallada rasmiga ah ee socdaalka.
25. U fududaynta dadka socdaalka ah ka bixidda dalka iyo soo gelistiisaba.
26. Hirgelinta go'aamada musaafirinta ajaanibka, si sharciga waafaqsan
27. Hoggaaminta xalinta khilaafaadka bulshada iyo wadaxaajoodyada iyada oo lala kaashanayo hay'adaha kale ee dawladda.
28. Soo saarista iyo hirgelinta qorshayaal iyo mashaariic lagu difaacayo shacabka xilliga nabadda iyo dagaalka iyadoo lala kaashanayo hay'adaha kale ee dawladda.
29. Qaadidda tallaabooyinka ammaan ee lagu xaqiijinayo, ammaanka, anshaxa iyo habsami u socodka doorashooyinka iyo hawlaha afti qaadista iyada oo isku xidhaysa hay'adaha kormeeraya anshaxa doorashooyinka, si waafaqsan xeerarka dalka.
30. Lashaqaynta iyo kafaa'iidaysiga waayo'aganimada Wasaaraddaha Arrimaha amniga dalalka aynu walaalahanahay iyo kuwa aynu saaxiibka nahay iyo ururrada gobollada iyo kuwa caalamiga ah ee kashaqeeya la dagaalanka dembiyada.
31. Ku dabagalka hay'adaha amniga fulinta go'aamada ay soo saaraan maxkamaduhu
32. Qiimaynta iyo dabagalka hay'adaha amniga
33. Diyaarinta iyo soojeedinta siyaasado, xeerar iyo qorshayaal ku aaddan sidii loo hagaajin lahaa amniga gudaha
34. Diyaarinta, soojeedinta iyo fulinta siyaasado loo adeegsado hub ka dhigista ciidan beeleedyada.
35. Diiwaangelinta iyo rusqadsiinta hay'adaha amniga ee gaarka loo leeyahay (private security companies)
36. Iskuxidhka mashaariicda nabadgelyo ee hay'adaha caalamiga ah ka fuliyaan gobollada iyo degmooyinka dalka
37. Soo diyaarinta nidaamyada siyaasadeed ee ugu habboon oo lagu sugi karo amniga gudaha
38. Xilkii iyo waajibaadyadii Wasaaraddii Arrimaha Gudaha ee ku jiray Xeerarka kala ah; Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud Xeerka Lr. 32/2010, Xeerka Ilaalinta Anshaxa iyo Nabadgelyada Guud ee Xeer Lr. 51/2012, Xeerka Socdaalka Somaliland Xeerka Lr. 72-95, Xeerka Jinsiyadda Xeer Lr.22/2002, Xeerka Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland. Xeer Lr. 85-2018, Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Xeer Lr. 63-2013, Xeerka Ciidanka Dabdemiska iyo Samatabixinta Xeer Lr 106-2023, Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha Xeer Lr-91-2023, iyo Xeerarka kale ee dhaqangalka ah waxa yeelanaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga.
39. Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 30aad

## Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Magaalooyinka

Iyada oo laga duulayo masuuliyadda xukuumadda ka saaran taabbagelinta maamul daadejin buuxda ee ku xusan qodobbada 110aad iyo 112aad ee Dastuurka JSL, si bulshada loogu dhaweeyo adeegyada arrimaha bulshada iyo dhaqaalaha, loogana taageero hawlaha iyo shaqooyinka dawladdaha hoose, iyo qorsheyaasha horumarinta magaalooyinka, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Magaalooyinku waa;

1. Korjoogtaynta iyo koormeeridda golayaasha degmooyinka dalka, si ay u noqdaan kuwa awood u leh hanashada adeegyada bulshada iyo horumarinta dhaqaalaha ee degaannadooda
2. Diyaarinta iyo horumarinta xeerarka, istiraatiijiyadaha iyo siyaasadaha dawladaha hoose iyo horumarinta magaalooyinka;
3. Xaqiijinta in degmooyinka loo dhaadhiciyo xafiisyada wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda dhexe ee bixiya adeegyada horumarka dhaqaalaha iyo arrimaha bulshadu ay shaqooyinkooda iyo awoodahooda u dhaadhicinayaan illaa heer degmo, si bulshada loogu dhaweeyo adeegyada, isla markaana loogu saleeyo xaaladaha iyo baahiyaha dhabta ah ee ka jirta deegaannada ay ka kooban yihiin degmooyinka dalku.
4. Xaqiijinta in golayaasha deegaanka ee degmooyinka dalka laga hirgeliyo xafiisyada heer degmo ee maamula adeegyada arrimaha bulshada ee ku xusan qodobka 112aad ee Dastuurka iyo xaqiijinta in loo daadajiyo madax xafiiseedyada iyo shaqaalaha ay u baahan yihiin xafiisyada heer degmo.
5. Magacaabista iyo xilkaqaadista xoghayayaasha dawladda hoose ee degmooyinka dalka.
6. Qiimaynta iyo kalaxadaynta xuduudaha degsiimooyinka hoos yimaadda gobollada iyo kalaxadaynta degmooyinka kale.
7. Soo diyaarinta xeerka lagu magacaabi karo gobol ama degmo si waafaqsan Xeerka Ismaamulka Gobollada Iyo Degmooyinka.
8. Kormeerka iyo dabagalka mashaariicda iyo shaqooyinka dawladaha hoose.
9. La xisaabtanka maamulada dawladaha hoose iyo hubinta xisaabaadka dawladaha hoose
10. Ka talabixinta miisaaniyadda dawladaha hoose ee sannadlaha ah
11. Hawlgelinta guddida maamul ee khilaafaadka dhulka magaalooyinka, si waafaqsan Xeerka Maamulka Dhulka Magaalooyinka, Xeer Lr: 17/2001;
12. Jaangoynta, qorshaynta iyo raadinta maalgelinta mashaariicda horumarineed ee heer caalami iyo kuwa dawladda dhexe
13. Hoggaaminta iyo xidhiidhinta siyaasadaha maamul daadjinta oo ku dhisan mabaadii'da maamul wanaagga iyo hanashada adeegyada bulshada iyo dhaqaalaha.
14. Ka talabixinta siyaasadaha, xeerarka iyo qorshayaasha ay samaysanayaan dawladaha hoose
15. Isku xidhka xukuumadda dhexe iyo maamulada golayaasha deegaanka ee degmooyinka.
16. Maamulidda dhaqaalaha dawladda dhexe siiso golayaashsa deegaanka (maamulka kabka dawladdaha hoose)
17. Dhisidda iyo tayaynta aqoonta iyo xirfadda goleyaasha deegaanka iyo horumarinta dawladaha hoose.
18. Isku xidhka mashaariicda horumarinta hay'adaha caalamiga ah ka fuliyaan dawladaha hoose ee degmooyinka dalka.
19. Qorshaynta iyo bixinta tababarrada shaqaalaha dawladaha hoose ee degmooyinka.
20. Soo diyaarinta nidaamyada siyaasadeed ee ugu habboon oo lagu horumarin karo dagmooyinka iyo magaallooyinka dalka,
21. Taageerada iyo isuduwidda shaqooyinka iyo hawlaha kala duwan ee dawladdaha hoose ee dalka.
22. Dejinta siyaasadaha, qorshayaasha iyo istaraatijiyadaha guud ee lagu hagayo dawladaha hoose.



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE ... SOLICITOR GENERAL OFFICE

23. Xaqiijinta in dawladaha hoose u hoggaansamaan siyaasadaha, xeerarka iyo xeer-nidaamiyayaasha lagu maamulayo nidaamka maamul iyo shaqo ee dawladaha hoose.
24. Dejinta iyo fulinta siyaasadaha la xidhiidha horumarinta magaalooyinka dalka iyo qorshaynta maagalooyinka iyo qaabdhismeedyadooda.
25. U soo gudbinta guddida qaran ee naqshadaha guud codsiyada ku saabsan dib u habaynta naqshadda magaalooyinka degmada iyo wax ka badelkeeda, si waafaqsan xeerka maamulka dhulka.
26. Kormeeridda xaaladaha horumarineed ee degmooyinka dalka, la-socoshada waaritaanka horumarka magaalooyinka iyo isku xidhka hawlaha la xidhiidha yaraynta saameynta deegaan ee ay keeni karaan fiditaanka iyo koboca magaalooyinku iyada oo lala kaashanayo hay'adaha kale ee dawladda ee ay khusayso.
27. Dejinta siyaasadaha iyo xeerarka la xidhiidha baahinta maamulka, horumarinta magaalooyinka, kormeerka iyo qiimaynta fulinta siyaasadaha iyo barnaamijyada kale ee lagu hormarinayo adeegyada dawladaha hoose bixiyaan.
28. Hormarinta iskaashiga iyo wadashaqaynta dawladaha hoose, hay'adaha kale ee dawladda, hay'adaha caalamiga ah, kuwa qaramada midoobay iyo bulshada reer Somaliland, si kor loogu qaado adeegyada dawladaha hoose bixiyaan iyo kaabayaasha ay ku shaqeeyaan.
29. Fududaynta kaqaybgalka bulshada ee la xidhiidha go'aan ka gaadhista arrimaha bulshada iyo horumarintooda, si loo xoojiyo kalsoonida bulshadu ku qabto maamulada deegaannada, loona abuuro kalsooni bulshadu ku qabto maamulkooda.
30. Soojeedinta kala diridda golayaasha deegaanka iyo u gudbinta Madaxweynaha oo leh awoodda kama dambaysta ah ee kala diriddooda, si waafaqsan Xeerka Ismaamulka Gobollada Iyo Degmooyinka Xeer Lr: 23/2019;
31. Istiqaaladda xubinta mudanaha golayaasah deegaanka iyo xilka qaadista Duqa Iyo Kuxigeenkiisa ee ku xusan Xeerka Ismaamulka Gobollada Iyo Degmooyinka, guddoomiyaha gobolku waxa uu kala shaqaynayaa Wasaaradda Dawlaha Hoose Iyo Horumarinta Magaalooyinka' si waafaqsan Xeerka Ismaamulka Gobollada Iyo Degmooyinka Xeer Lr: 23/2019;
32. Ku dhawaaqidda maalinta fadhiyada ugu horreeya ee golayaasha deegaannada ee degmooyinka dalka ay ka qabsoomayso kaddib marka maxkamadda gobolku ku dhawaaqdo natiijada kama danbaysta ah ee doorashada mudanayaasha cusub, si waafaqsan Xeerka Ismaamulka Gobollada Iyo Degmooyinka Xeer Lr: 23/2019;
33. Xilalkii iyo waajibadyadii Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee ku jiray Xeerka Ismaamulka Gobolladda iyo Degmooyinka, Xeer Lr. 23/2019, Xeerka Maamulka Dhulka Magaalooyinka Xeer Lr: 17/2001, iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah ee la xidhiidhay maamulka dawladaha hoose iyo degmooyinka dalka waxa yeelanaysa Wasaaradda Dawlaha Hoose iyo Horumarinta Magaalooyinka.
34. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku

**Qodobka 31aad**

**Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha**

Iyada oo xaqiijinaysa xilka xukuumadda kasaaran ka hortegidda in barwaaqadu ku koobnaato dad yar, isla markaana aanay dhalan dabaqado dhaqaale, kor u qaadida heerka nolosha iyo guud ahaanba horumarinta dhaqaalaha dalka, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaaluhu waa:

1. In ay curiso xeerarka maaliyadeed ee dalka, si loo ilaaliyo dhaqaalaha dalka loona hubiyo in dakhliga dawladda dhexe si habboon loo isticmalo;
2. In ay dejiso, hirgalisana siyaasadda maaliyadda qaranka iyo horumarinta miisaaniyadda.
3. In ay fuliso, hirgelisana xeerarka lagu hagayo maamulka maaliyadda qaranka.
4. In ay soojeediso, hirgelisana marka loo ansixiyo hannaan iyo xeerar kor loogu qaadayo, islamarkaana lagu ilaaliyo dakhliga dawladda.
5. Inay hoggaamiso oo isku xidho heshiisyda iskaashiyada dhaqaale ee jamhuuriyadda Somaliland la leedahay dalalka kale iyo ururrada caalamiga ah.
6. Inay ilaaliso saamiyada dawladda Somaliland iyo hantida kale ee maaliyayeed ee qaranku leeyahay.
7. Inay diyaariso miisaaniyadda sannadlaha ah ee dawladda, sidoo kalana bixiso kharashyada si waafaqsan miisaaniyadda la ansixiyay iyo in ay xaqiijiso ku dhaqanka miisaaniyadda;
8. In ay abuurto dakhliga iyo cashuuraha maaliyadda iyadoo adeegsanaysa hay'adda dakhliga,
9. Inay dibuhabayn iyo dibu'eegis ku samayso tacriifadaha, si kor loogu qaado dakhliga.
10. In ay hubiso, dabagasho bixinta cashuuraha aan tooska ahayn ee ay soo xareeyaan hay'adaha kale dawladdu.
11. In ay ururiso cashuuraha kala duwan ee dawladda dhexe qaado iyada oo adeegsanaysa hay'adda dakhliga.
12. In ay xaqiijiso isku dheelitirka kharashaadka iyo dakhliga xukuumadda
13. In ay xaqiijiso dajinta nidaam dhaqaale oo kor u qaadaya heerka nolosha iyo horumarka dalka.
14. In ay fuliso, sidoo kalana dabaqdo siyaasadaha iyo xeerarka lagu maamulo maaliyadda iyo dakhliga guud ahaan.
15. In ay xaqiijiso ku dhaqanka qorshaha miisaaniyadda ee hay'adaha kala duwan ee xukuumadda.
16. In ay xaqiijiso ilaalinta hantida guurtada ah ee hay'adaha dawladda, isla markaana samayso diiwaan dhexe oo lagu keydiyo xogta hantida.
17. In ay bixiso taageero farsamo oo la xidhiidha maaliyadda oo ay siiso laamaha xukuumadda.
18. In ay dejiso siyaasadda iyo istiraajiyadda dhaqaale ee dalku leeyahay oo lagu salaynayo mabaadii'da suuqa xorta ah iyo isgarabsiga hantida gaar ahaaneed, hantida wadareed iyo hantida xukuumadda.
19. In ay ka talabixiso dhammaan mashaariicda iyo barnaamijyada horumarineed ee u baahan taageero dhaqaale, ka hor intaan la oggolaanin.
20. In ay fuliso siyaasadaha iyo xeerarka maaliyadeed, si waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa maaliyadeedba iyo
21. Xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 32aad

## Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer Miyiga;

Iyadoo gudanaysa xilka xukuumadda ka saaran waxsoosaarka xoolaha nool isla markaana dhawraysa muhiimadda istiraatijiyadeed ee xoolaha nooli u leeyahay dhaqaalaha dalka, Wasaaradda



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD ... OFFICIAL ... SOLICITOR GENERAL OFFICE

Xannaaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer Miyigu waxay yeelanaysaa awoodahan iyo shaqooyinkan soo socda:

1) Curinta sharciyo, xeernidaamiyayaal, siyaasado iyo halbeegyo lagu horumarinayo khayraadka xoolaha iyo ka faa'iidaysigooda;
2) Dejinta siyaasadaha iyo qorshahawleedyada lagu ilaalinayo, isla markaana lagu horumarinayo caafimaadka xoolaha iyo tayaynta waxsoosaarka xoolaha.
3) Dhiirrigelinta fursadaha maalgashi ee adeegyada xoolaha JSL ;
4) Xidhiidhinta hay'adaha maxaliga ah iyo kuwa heer caalami ee ku hawlan horumarinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadka xoolaha iyada oo la siinaayo taageero farsamo;
5) Diyaarinta iyo hirgelinta nidaamka ka hortagga dhoofinta xoolaha dheddig;
6) Xaqiijinta kahortagga iyo xakamaynta cudurrada xoolaha ee xuduudaha isaga tallaaba;
7) Hirgelinta iyo koruqaadista maxjarrada, xeraguullada (holding grounds), iyo rugaha caafimaadka xoolaha gaar ahaan kuwa xuduudaha;
8) Daryeelka iyo kobcinta xoolaha nool iyo wixii ka soo baxa sida cadka, caanaha, subagga, saamaha iyo haragga;
9) Shahaado-siinta caafimaad-qabka dhoofinta iyo isticmaalka gudaha ee Xoolaha iyo wixii laga soo saaro;
10) Kobcinta xirfadda xooladhaqatada, shirkadaha maalgashada xoolaha iyo cid kasta oo ku hawlan waxsoosaarka xoolaha, si kor loogu qaado waxsoosaarka xoolaha;
11) Abuurista hab lagu xaqiijinayo caafimaadka xoolaha iyo waxsoosaarka xoolaha ee lagu suuqgaynayo iyo ku ilaalinta dabbaqaadda nidaamka;
12) Kobcinta awoodda cid kasta oo ka ganacsata xoolaha, si loo xaqiijiyo inuu waxsoosaarkoodu daboolo baahida suuqa ganacsiga, lana dhiso nidaam lagu ilaalinayo waxsoosaarkooda;
13) Dhismaha nidaam xaqiijinaya helitaanka adeegyada caafimaadka xoolaha oo tayo leh, si kor loogu qaado ka hortagga iyo xakamaynta cudurrada xoolaha;
14) Dejinta nidaamyada lagu suuq gaynayo waxsoosaarka xoolaha;
15) Dejinta nidaam lagu horumarinayo dhaqaalaha xoolaha (pastoral economy).
16) Dejinta nidaam lagu xaqiijinayo isdhexgalka iyo isku xidhka daneeyayaasha ku hawlan cilmibaadhista xoolaha;
17) Abuuridda iyo horumarinta keydka calafka xoolaha.
18) Ka hawlgelidda kor u qaaddidda adkaysiga bulshada xoolo dhaqatada ah ee arrimaha isbeddelka cimilada iyadoo la kaashanaysa hay'adaha dawladda ee khuseeya isbeddelka cimilada.
19) Diyaarinta iyo hirgalinta siyaassada qaranka ee la xidhiidha horumarinta reer miyiga Jamhuuriyadda Somaliland;
20) Abuuridda qorshayaal ku wajahan kor u qaadidda iyo daryeelka hab nolaleedka bulshada reer miyiga ah;
21) Daraasaynta iyo soo bandhigidda hindise cilmiyeed lagu horumarinayo nolosha bulshada reer miyiga ah, iyadoo la ogaanayo caqabadaha iyo baahiyaha, soona jeedinaysa xalka suurtagalka ah ee kor loogu qaadayo fursadaha reer miyiga;

22) Ka hawlgalidda iyo fududaynta in adeegyada aasaasiga ee arrimaha bulshadu ay gaadhaan bulshada reer miyiga ah iyadoo la kaashanaysa hay'adaha ay dawladda ee ay khusayso.
23) Horumarinta iyo kor u qaadidda xaaladda nololeed ee bulshada reer miyiga ah, si loo cidhibtiro saboolnimada, korna loogu qaado dhaqaalaha bulshada;
24) Taageeridda iyo ka hawlgalidda sidii loo heli lahaa tababarro loogu talo galay in lagu dhiso awoodaha iyo xirfadaha bulshada reer miyiga ah;
25) Hirgalinta hannaanka ka qaybqaadashada iyo abuuridda lahaanshaha ee mashaariicda iyo barnaamijyada bulshada reer miyiga;
26) Isuduwidda iyo ka war bixinta barnaamijyada iyo mashaariicda horumarinta ee reer miyiga;
27) Iyo fulinta xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 33aad
## Wasaaradda Macdanta Iyo Tamarta

Iyada oo fulinaysa xilka iyo waajibaadka xukuumadda ka saaran ilaalinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadka dabiiciga ah xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Macdanta iyo Tamartu waa:

1. Inay dejiso siyaasadda xukuumadda ee ku waajahan sidii loo sahamin lahaa, isla markaana looga faa'iidaysan lahaa khayraadka dabiiciga ah ee dalka.
2. Inay bixiso, sidoo kalana maamusho ruqsadaha hawlaha sahaminta, baadhista iyo qoditaanka shidaalka iyo macdanta, si xeerarka waafaqsan.
3. Inay horumariso arrimaha khuseeya daahfurida shidaalka, macdanta iyo khayraadka kale ee dhulka ku duugan marka laga reebo biyaha.
4. Inay dejiso qorshayaasha iyo barnaamujyada lagaga faa'iidaysto khayraadka macdanta iyo shidaalka iyada oo lagu xisaabtamo arrimaha deegaan iyo dhaqaale;
5. Inay ka hawl gasho Ilaalinta, isticmaalka iyo maamulka khayraadka dabiiciga ah ee dalka.
6. Inay bixiso ruqsadaha aqoonsiga shirkadaha shidaalka.
7. Inay horumariso cilmibaadhista teknoolajiyadda xagga tamarta.
8. Inay iskudubariddo, sidoo kalana dejiso halbeegyada shaqo ee looga baahan yahay mashariicda awoodda korantada.
9. Inay xaqiijiso in laga faa'iidaysto ilaha xoogga tamarta qoraxda iyo dabaysha iyo ilaha kale ee tamarta dib loo cusboonaysiin karo.
10. Isku dubaridka iyo dejinta hal beegyada shaqo ee looga baahan yahay mashaariicda awoodda korontada laga dhaliyo ee magalooyinka iyo miyiga Somaliland.
11. Inay horumariso, fududayso, dammaanad qaadida iyo tageerida adeegsiga tamarta la cusboonaysiiyo iyo khayraadka kale, si ay u isticmaalaan dadweynaha Somaliland.
12. Inay diyaariso qorshaha xukuumadda ee fududaynta hawlaha macdan baadhista si loo dhiirigaliyo maalgashiga.
13. Inay ururiso, kaydiso sidoo kalana xafiddo xogaha kaydka macdanaha iyo tamarta dalka, iyo samaynta bangi lagu kaydiyo macluumadka cilmiyeed ee la xidhiidha macdanta si loo ogaado xaddiga khayraad macdaneedka somailand leedahay



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

14. Inay diiwaangeliso ilaalisana diiwaanada shirkadaha wada hawlaha macdaneed iyo mashaariicda kale ee ku lammaan.
15. Inay samayso hab raacayada deegaanka iyo shuruudaha looga baahan yahay hawlaha macdan qodiseed.
16. Inay diyaariso siyaasado dhamaystiran oo khuseeya khayraadka tamarta, macdanta iyo shidaalka Somaliland, kana warbixiso fulintooda.
17. Iyo inay fuliso xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xilsaaraan Xeerarka dalku.

## Qodobka 34[aad]
## Wasaaradda Horumarinta Biyaha

Iyada oo xukuumadda xil ka saaranyahay in muwaaddiniintu helaan biyo kufilan oo nadiif ah, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Biyahu waa:

1. Inay curiso xeerarka, siyaasadaha iyo qorshayaasha horumarinta khayraadka biyaha.
2. Ka faa'iidaynta khayraadka biyaha dalka.
3. Inay hirgaliso xeerarka iyo siyaasadda xukuumadda ee biyaha qaranka.
4. Inay xaqiijiso daboolidda baahiyaha biyaha nadiifta ah si loo xaqiijiyo in muwaaddin kastaa helo biyo nadiifa oo ku filan.
5. Dejinta siyaasadda iyo halbeegyada maalgelinta biyaha,
6. Kormeeridda, fulinta shuruucda iyo maaraynta arrimha khuseeya ka hortagga iyo xakamaynta wasakhawga biyaha
7. Inay ka qodo ceelal iyo keydadka biyaha nadiifta ah ee goobaha miyiga ah, si bulshada reer guuraagu u helaan biyo nadiifa oo ku filan.
8. Inay maamusho, isla markaana dayactirto ceelasha dhaadheer iyo goobaha kale ee biyaha ee ka baxsan magaalooyinka waaweyn.
9. Inay u samayso guddiyo maamula, isla markaana daryeela ceelasha tuulooyinka iyo goobaha miyiga ah, si looga hortago dayacaadda ku imaan karta ceelasha biyaha.
10. Inay samayso tirakoob iyo diiwaan lagu xafido tirada adeegyada biyaha dalka.
11. Inay u samayso bulshada xoolo dhaqatada ah goobaha waraabka xoolaha, si xoolaha dalku u helaan adeegga biyaha.
12. Qiimaynta, qorshaynta, xidhiidhinta iyo samaynta istiraatiijiyado iyo siyaasado la xidhiidha biyaha.
13. Inay qabato daraasado ku saabsan khayraadka biyaha dalka, si loo helo xogta mugga biyaha dhulka hoostiisa iyo kuwa oogadaba, si loo fududeeyo ka faa'iidaysigooda.
14. Inay ka hawl gasho in la sameeyo daraasado, cabirro iyo farsamada dhismaha, si loo dhiirrigeliyo biyo xidheennada yaryar iyo kuwa waaweyn ee waraabka,
15. Inay ka hawlgasho in biyaha nadiifta ah la wada helo (potable water supply coverage), sidoo kalana isududo hirgalinta mashaariicda laga maalgeliyo kaalmooyinka shisheeye.
16. Inay dejiso, isla markaana hirgeliso siyaasadda xukuumadda ee lagaga faa'iidaysanayo biyaroobaadka.
17. Inay samayso biyo xidheenno si looga faa'iidaysto qulqulka biyaha badda ku darsama sannad kasta.
18. Inay samayso, hirgelisana nidaamyo farsamo iyo kuwo aan farsamo ahaynba ee hal-beegyada biyaha, si loo ilaaliyo adeegsiga biyaha iyada oo la adeegsanayo aqoon, qalab iyo farsamo ku habboon.



XAFIISKA QARYAASHA GUUD ... OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

19. Inay bixiso ruqsadaha shirkadaha biyaha iyo ruqsadaha biyo soosaarka dalka.
20. Iyo in ay fuliso xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 35aad
## Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeynta

Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeyntu waxa ay yeelanaysaa awoodahan iyo shaqooyinkan soo socda:

1. Curinta iyo diyaarinta siyaasadaha, xeerarka iyo qorshayaasha lagu maamulayo guud ahaan dhulka JSL iyo dhismayaasha.
2. Diyaarinta dhul hay'adaha dawladda looga dhiso xafiisyo dawladeed oo ay ku gutaan waajibaadkooda shaqo iyo sidoo kale joogtaynta dayactirka xafiisyada dawladda.
3. Samaynta iyo kormeeridda naqshadaha guud (Master Plan) ee dhulka magaalooyinka, si waafaqsan Xeerka Dhulka Magaalooyinka Xeer Lr: 17/2001.
4. Keydinta nuqullada asalka ah (original) ee dhammaan nashqadaha guud ee magaalooyinka dalka iyadoo nuqullo u qaybin doonta dawladaha hoose ee dalka, si ay ugu maamulaan arrimaha dhulka degsiimada ah.
5. Keydinta nuqullada asalka ah ee xafiisyada dawladda iyo dhismayaasha danta guud ee dalka.
6. Ilaalinta ku xadgudubka naqshada guud (Master Plan-ka) ee fidinta magaalooyinka ee ay soo codsatay maamulka dawladaha hoose, guddida naqshadaha guudna ay ansixiyaan, si waafaqan Xeerka Dhulka Magaalooyinka Xeer Lr: 17/2001.
7. Diyaarinta Xeerka Dhulka Jamhuuriyadda Somaliland (Somaliland Land Act), iyadoo kaaashanaysa hay'adaha dawladda ee ay khusayso,
8. Curinta iyo diyaarinta siyaasadda qaranka, istaraatijiyadaha iyo barnaamijyada xukuumadda ee maamulka dhulka, guriyeynta iyo hawlaha guud.
9. Horumarinta iyo dhismaha kaabayaasha dhaqaalaha ee dalka si ay uga qaybqaataan horumarka dhaqaalaha iyo kor u qaadidda shaqo abuurka.
10. Bilaabidda dib u habaynta iyo wax ka beddelka xeerarka hadda jira ee dhulka, guriyeynta iyo hawlaha guud.
11. Diiwaangalinta iyo maamulidda hantida maguurtada ah ee dawladda iyadoo diiradda lagu saarayo xaaladda ay ku sugan yihiin iyo arrimaha ku xeeran.
12. Abuuridda diiwaannada heer gobol, degmo iyo heer qaran ee hantida maguurtada ah.
13. Diiwaangelinta iyo khariidad u samaynta dhulka iyo dhismayaasha dawladda ee ay ka mid yihiin dugsiyada dawladda, goobaha caafimaadka dadka iyo xoolaha, masaajiddada, garoomada ciyaaraha, xeryaha ciidamada, sabooyinka ceelasha biyaha, seerayaasha IWM.
14. Xaddidaada halbeegga dhismaha iyo kormeerka dhismayaasha iyo goobaha dadweynaha, si loo hubiyo bedqabka dhismaha, loogana badbaadiyo muwaadinka halista khataraha dhismaha;
15. Kormeeridda dhismayaasha iyo xaqiijinta in loo hoggaansamay halbeegayda dhismaha, si kor loogu qaado badbaadada dhismaha.
16. Qiimaynta, aqoonsiga iyo tababaridda injineerada dhismaha ee dalka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARAN
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

17. Ruqsad siinta iyo diiwaangalinta shirkadaha dhismaha iyo (Real state-ka). Iyadoo shirkadaha loo kala saari doono derajooyin ku salaysan awoodahooda dhaqaale, injineernimo iyo khibradooda.

18. Diiwaangelinta iyo bixinta shahaadooyinka xirfadda injineerada iyo naqshadeeyayaasha dhismaha (engineers and architects)
19. Dabagalka iyo la socodka shaqada shirkadaha dhismaha iyo dhismayaasha.
20. Nashqadaynta, qiimeynta iyo ilaalinta dhismaha buundooyinka waawayn (Bridges) ee magaalooyinka gudahooda.
21. Diyaarinta, qiimaynta iyo ansixinta nashqadaha dhismayaasha danta guud oo ay ku jiraan kuwa lagu caawiyo dalka iyo ilaalinta dhismayaasha.
22. Oggolaanshaha goobaha laga dhisayo warshadaha samaynta jayga (crushers) iyo ruqsadsiintooda.
23. Kahortagga dhibaataynta deegaanka ee ay sababi karaan hawlaha dhismaha ee ka socda dalka iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka deegaan ee ka dhasha hawlaha dhismaha, iyadoo la kaashanaysa wasaaradda ku shaqada leh deegaanka, si loo xaqiijiyo ku dhaqanka xeerarka dalka iyo kuwa caalamiga ah ee ilaalinta deegaanka.
24. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka kale ee dalku.

## Qodobka 36[aad]
## Wasaaradda Gaadiidka Iyo Hormarinta Jidadka

Wasaaradda Gaadiidka iyo Hormarinta Jidadku waxay yeelanaysaa awoodahan iyo waajibaadyadan soo socda:

1. Inay curiso xeerarka iyo siyaasadaha lagu xaqiijinayo helitaanka adeegyada gaadiidka badda iyo dhulka oo nabdoon, isla markaana ah mid laysku halayn karo.
2. Inay dejiso, isla markaana fuliso qorshayaasha xukuumadda ee dhismaha, dayactirka iyo maamulka jidadka
3. Inay bixiso oggolaanshaha ruqsadaha gaadiidka dhulka, badda, sidoo kalena ay bixiso oggalaanshaha furashada goobaha barashada wadista gadiidka
4. Inay maamusho adeegyada isu socodka dadka iyo alaabta, isla markaana xaqiijiso isu gudubka badeecadaha, ganacsiga iyo adeegga xamuulka ee u kala gudbaaya dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.
5. Inay xaqiijiso dhismayaasha kaabayaasha gaadiidka, casriyayntooda iyo ilaalintooda.
6. Inay dejiso, qorshayso isla markaana, fuliso tallaabooyinka lagu xallinayo saamaynta gaadiidku ku leeyahay isbedelka cimiladda.
7. In ay nidaamiso isla markaana jaangoyso ka go'aan gaadhista noocyada gaadiid ee ku habboon dalka.
8. Inay tirakoobto nocyada gaadiidka kala duwan ee dalka, sidoo kalana abuurto keydin si fudud looga heli karo xogta gaadiidka dalka.
9. Inay isku xidho tallaabooyinka horumarinta jidadka, dayactirkooda, sidoo kalana uga masuul noqoto xukuumadda wax kasta oo ku saabsan gaadiidka iyo hormarinta jidadka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

10. Inay dejiso siyaasadaha kaabayaasha waddooyinka dalka iyo gaadiidka, sidoo kalana isku xidho mashaariicda horumarineed iyo maamulkooda ee la xidhiidha horumarinta kaabayaasha gaadiidka iyo waddooyinka.
11. Waa in ay daraasad ku samayso, isla markaana qorshayso curinta iyo fulinta xeerarka, siyaasadaha, qorshayaasha, hagayaasha iyo dhammaan habraacyada lagu xaqiijinayo bixinta iyo helitaanka adeegyada la xidhiidha gaadiidka badda iyo dhulka.
12. Waa in ay maamusho, sidoo kalana habayso nidaamka waddamarista dalka
13. Waa in ay bixiso oggolaanshaha, diidmada, hakinta, wax ka beddelka iyo laalista ruqsadaha noocyada gaadiidka dhulka iyo badda.
14. Diwaangalinta iyo ruqsadsiinta gaadiidka badda ee dadweynaha iyo gaadiidka badda ee dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay.
15. Waa in ay qiimayn, maamulid iyo dabagal ku samaysaa fulinta mashaariicaha horumarineed iyo kuwa maalgalineed ee la xidhiidha kaabayaasha noocyada gaadiidka ee kala duwan ee gaadiidka.
16. Waa in inay tirakoobto isla markaana, keydiso noocyada gaadiidka kala duwan ee dalka, sidoo kalana abuurto diiwaan guud oo si fudud looga heli karo xogta gaadiidka dalka iyo adeegsigooda
17. Waa in ay isku xidho qorshayaasha iyo tallaabooyinka horumarineed ee dawladda dhexe iyo dawladaha hoose ee la xidhiidha dhismayaasha jidadka iyo dayactirkooda.
18. Waa in ay soo saarto habraacyo la xidhiidha iibka, xaraashka, adeegsiga, dayactirka, burburinta iyo u kala wareejinta noocyadda gaadiidka dawladda ee hay'addaha dawladda.
19. Waa in ay bulshada ku wacyi galisaa khataraha ka dhalan kara shilalka gaadiidka
20. Waa in ay dejiso habraacyo iyo hagayaal lagu yaraynaayo shilalka gaadiidka, isla markaana, lagu keydinaayo xogaha la xidhiidha shilalka si wax looga qabto.
21. Waa in Laanta Nabad Galyadda Waddooyinka ee Ciidanka Booliska ay u hoggaansamaan, isla markaana, fuliyaan awaamiirta iyo go'aamada la xidhiidha gaadiidka iyo nabad galyada waddooyinka ee ay soo saarto wasaaraddu, si xeerka waafaqsan.
22. Inay fuliso xilalka iyo waajibadyada kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 37[aad]
## Wasaaradda Ganacsiga Iyo Dalxiiska

Iyada oo xukuumadda xil ka saaran yahay horumarinta ganacsiga dalka iyo ku xidhidda ganacsiga caalamiga ah, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Ganacsiga Iyo Dalxiisku waa:

1. Inay diyaariso siyaasadaha, istaratiijiyadaha iyo qorshayaasha dhiirrigelinaya horumarinta ganacsiga iyo dalxiiska, sidoo kale fulintooda marka loo ansixiyo.
2. Inay abuurto jawi ganacsi oo habboon si loo dhiirigaliyo ganacsatada dalka gudihiisa iyo kuwa ajanabiga ahba.
3. Inay dejiso qiimayaasha badeecadaha kala duwan iyo xaqiijinta in badeecadaha dalka imanayaa ku yimadaan qiime macquul ah si bulshada loogu daneeyo.
4. Inay dejiso siyaasadda kala xadaynta ganacsiga iyo dabbaqaadeeda.



XAFIISKA QARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

5. Inay abuurto xidhiidho ganacsi oo lala yeesha waddamada jaarka, kuwa gobolka iyo adduunka kalaba si loo iibgeeyo waxsoosaarka dalka, xidhiidh ganacsi oo kala duwanna loola yeesho adduunka.
6. Inay dejiso siyaasadda hagaysa heshiisyada ganacsi ee xukuumaddu dhinac ka tahay iyo sidoo kale inay Xukuumadda ku metesho dhammaan heshiisyada ganacsi ee gudaha iyo dibaddaba si waafaqsan xeerarka dalka.
7. Inay diiwaangeliso ganacsiga dalka sidoo kalana bixiso liisamada ganacsiga si waafaqsan xeerka liisamada ganacsiga.
8. inay abuurto jawi dhiirigelinaya kor u kaca kaqayb-galka ganacsiga gaarka loo leeyahay, sidoo kalana u fududayso
9. inay dhiiri geliso ballaadhinta ganacsiga waxsoosaarka gudaha, sidoo kalana qaado tallaabooyinka lagu ilaalinayo nidaamka ganacsi ee sharciga ah;
10. inay abuurto jawi ku habboon oo saamaxaya in la ballaadhiyo lana horumariyo ganacsiga dhoofinta wax-soo saarka dalka;
11. Inay bixiso adeega diiwaangelinta iyo bixinta liisamada ganacsiga oo fudud, qiimagal ah, kuna salaysan habka tiknoolajiyadda casriga.
12. Inay kormeerto, lana socoto qiimayaasha badeecadaha kala duwan isla markaana u gudbiso Golaha Wasiirada iyo Madaxweynaha, si wax looga qabto qiimayaasha badeecadaha aan shacabka u danaynayn.
13. Inay dhiirrigeliso dalxiiska iyo abuuritaanka goobaha dalxiiska ku fiican ee dalka;
14. Inay dejiso qorshayaasha dalxiis ee dalka.
15. Inay ilaaliso, xafiddana aasaarta qadiimiga ah ee dalka.
16. In ay raadiso, abuurtana goobo ku habboon dalxiska, fulisana cilmibaadhisaha goobaha dalxiiska.
17. Inay wax ka qabato cabashooyinka la xidhiidha arrimaha ganacsiga, si waafaqsan xeerarka dalka.
18. Inay gudato xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay siiyaan xeerarka kale ee dalku.

## Qodobka 38[aad]
## Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Wershadaha

Iyada oo ka duulaysa xilka ka saaran xukuumadda dhiirrigelinta wershedaha ku shaqeeya waxsoosaarka waddaniga ah xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Wershaduhu waa:

1. Inay curiso xeerarka, siyaasadaha iyo qorshayaasha maalgelinta, si loo abuuro jawi maal gashadayaashu ku soo hiran karaan kuna maalgashan karaan dalkeenna.
2. Inay dib u eegto shuruucda maalgashiga dalka, una soo jeediso Madaxweynaha talooyinka siyaasadeed ee ku saabsan maalgashiga.
3. Inay isku xidho hawlaha maalgashi ee maal gashadayaasha maxaliga ah iyo kuwa ajanabiga ahba.
4. Inay ururiso, daraasayso sidoo kalana cusbooneysiiso macluumaadka ku saabsan fursadaha maalgashiga iyo ilaha maalgashi ee dalka iyo xuquuqaha ama dhiirigelinta ay heli karaan maalgashadayaashu.
5. Inay diiwaangaliso shirkadaha maalgashiga, sidoo kalana ilaaliso xuquuqda maalgashadayaasha.

6. Inay qabato codsiyada shahaadooyinka maalgashiga, sidoo kalana bixiso, cusboonaysiiso ama kala noqoto shahaadooyinka maalgashiga ee xadka awoodda wasaaradda,
7. Inay diiwaangeliso raasamaalka maalgashiga ay shirkadaha shisheeye ku maalgaliyaan dalka.
8. Inay fuliso siyaasadaha iyo qorshayaasha maalgashi ee dalka.
9. Inay Kormeerto, dabagashana mashaariicda maalgelinta si loo xaqiijiyo ku dhaqanka xeerarka iyo ruqsadaha maalgelineed ee dalka.
10. Inay xoojiso xidhiidhka maalgashadayaasha, dawladda iyo dadwaynahaba.
11. Inay dhiirrigeliso maalgashiga warshadaha waxsoosaarka dalka sida; beeraha iyo xoolaha.
12. Inay dejiso korjoogtaysana siyaasadaha horumarinta warshadaynta iyo ku dhiirrigelinta ganacsatada maalgashiga wershadaha.
13. Inay curiso istraatijiyadda sharciyo iyo xeerar lagu dhiirrigelinayo waxsoosaarka warshadaha yaryar iyo kuwa dhexe.
14. Inay maarayso caqabadaha soo wajaha barnaamijka warshadaynta.
15. Inay ku ilaaliso warshadlayda fulinta siyaasadda deegaanka, xeerarka iyo halbeegyada maaraynta wasakhda hadhaaga warshadaha.
16. Inay dhiirrigeliso kobcisana farsamooyinka waddaniga ah ee ganacsi.
17. Inay dejiso qorshayaal suuq loogu raadinayo, lagu horumarinayo, laguna ballaadhinayo waxsoosaaarka warshadaha dalka.
18. Inay ka taakulayso warshadlayda hawlaha maalgelinta warshadaha iyo warshadaynta, si ay u fuliyaan shuruudaha ilaalinta deegaanka.
19. Inay hirgeliso nidaam iskaashi oo lala sameeyo dalalka Somaliland saaxiibbada latahay, si looga helo taakulayn kobcinta aqoonta iyo khibradda teknoolajiyadda horumarinta warshadaha.
20. Inay xaqiijiso in warshadaha dawladdu leedahay, si wanaagsan loo maareeyo loona ilaaliyo, dejisana habab suurtagelinaya in la maalgashado, si sharciga waafaqsan.
21. Inay dhisto meelo iyo goobo loogu talagalay warshadaha horumarintooda, barnaamajyadooda iyo mashaariicda kale ee la xidhiidha warshadaha.
22. Inay fuliso daraasaynta khayraadka dalka iyo khariidadaynta dhulka leh khayraad maalgashi warshadeed iyo soo bandhigidda fursadaha maalgashi ee khayraadka dalka.
23. Inay diyaariso tallaabooyinka laga qaadayo cid kasta oo ku gefta badeecadaha ganacsi, isla markaana hoos marta heerka loo dejiyay.
24. Inay keydiso xogta ganacsi iyo warshadaha dalka
25. Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 39[aad]
## Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka

Iyada oo fulinaya waajibka xukuumadda ka saaran ka haqabtirka dalka qalabka ka hortagga cudurrada faafa, helitaanka daaweyn lacag la'aan ah iyo daryeelka fayadhawrka guud, horumarinta iyo baahinta adeegyada caafimaadka iyo xarumaha daryeelka caafimaadka gaarka ah, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Caafimaadku waa:



XAFIIS... OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

1. In ay curiso xeerarka, siyaasadaha iyo qorshayaasha maamulka iyo horumarinta adeegga caafimaadka ee dalka.
2. In ay dejiso hirgalisana siyaasadda daryeelka caafimaadka guud ee dalka.
3. In ay abuurto ama dhisto xarumaha caafimmadka, si loo horumariyo adeeg bixinta caafimaadka loona daboolo baahida adeegyada caafimaad ee dalka,
4. In ay kormeerto xarumaha adeeg bixinta caafimaadka ee dalka, si loo xoojiyo in bulshadu hesho adeeg hufan oo caafimaad.
5. In ay abuurto dhiirigalisana xarumaha barashada culuumta la xidhiidha caafimaadka.
6. In ay xaqiijiso in muwaaddiniintu helaan daaweyn iyo adeeg caafimaad oo lacag la'aan ah.
7. In ay hirgaliso xarumaha iyo nidaamka lagu hubiyo daawooyinka dalka soo gala iyo isticmaalkoodaba.
8. In ay ka hawlgasho xaqiijinta daryeelka fayadhawrka guud ee dalka.
9. In ay dejiso halbeegyo, xeernidaamiyayaal iyo hagayaal hawlaha caafimaadka ee lagu ilaalinayo caafimaadka muwaaddiniinta.
10. In ay Isku xidho barnaamijyada xakamaynta, daaweynta iyo la dagaalanka cudurrada HIV/AIDS, qaaxada iyo duumada iyo cudurrada bulshada khatarta ku ah ee soo kordha.
11. In ay hubiso shahaadooyinka hawlwadeennada adeegyada caafimaadka gaarka loo leeyahay iyo ku dhaqanka nidaamyada iyo sharciyada adeegyadaas.
12. In ay kormeerto xarumaha caafimaadka gaarka loo leeyahay, hubisana sharciyada xarumahaas.
13. In ay xaqiijiso habsami u socodka iyo helitaanka adeegyada tallaalka carruurta iyo cudurrada faafa.
14. In ay bixiso tababarrada hawlwadeenada iyo xirfadlayaasha xarumaha caafimaadka dawladda, si kor loogu qaado aqoonta iyo shaqada adeegyada caafimaad ee dalka.
15. Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 40aad
## Wasaaradda Waxbarashada Barbaarinta iyo Sayniska

Wasaaradda Waxbarashada iyo Saynisku, waxay yeelanaysaa awoodahan iyo shaqooyinkan soo socda:

1. In ay dejiso, isla markaana fuliso siyaasadda xukuumadda ee lagu tirtirayo aqoon la'aanta, islamarkaana kor loogu qaadayo heerka aqooneed ee muwaaddiniinta.
2. In ay xaqiijiso in la daboolo baahida aqoonyahan ee dalku u baahanyahay isla markaana la gaadho hiigsiga waxbarasho ee qorshaha qaranka.
3. In ay dejiso, isla markaana hirgaliso manaahijta heerarka kala duwan ee waxbarashada dalka, kuwaas oo ku salaysan diinta Islaamka, dhaqankeenna suubban iyo dabeecadda gaar ahaaneed ee deegaanka iyo bulshada Somaliland.
4. In ay ka hawlgasho midaynta manaahijta waxbarshada dalka, lagana dhaqangeliyo guud ahaan dugsiyada dawladda iyo kuwa gaarka ahba.
5. In ay dejiso siyaasadda iyo qorshaha qaranka ee waxbarshada dalka, isla markaana dhaqangeliso oo kormeerto hirgalintooda iyo ku dhaqankooda.
6. In ay hirgaliso dugsiyada iyo mac-hadyada waxbarashada aqoonta farsamada gacanta, (TVT).



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

7. In ay soo saarto aqoonyahan leh akhlaaq, dad iyo dal jacayl.
8. In ay dejiso siyaasadda lagu horumarinayo waxbarashada dadka waaweyn, isla markaana lagu tirtirayo qoris iyo akhris la'aanta dadka waaweyn.
9. In ay diyaariso, isla markaana maamusho imtixaanka qaranka, kaas oo ku salaysan siyaasadda tacliinta iyo manaahijta dalka.
10. In ay keydiso xafiddana imtixaannada, sidoo kalana bixiso shahaadooyinka.
11. In ay fidiso adeegyada waxbarshada dalka, si loo xaqiijiyo in deegaannada dalku ay wada helaan adeegyada waxbarshada, si waafaqsan xeerka waxbarashada.
12. In ay xukuumadda kala taliso horumarinta adeegyada waxbarshada dalka,
13. In ay horumariso sidii si siman loogu heli lahaa fursadaha waxbarashada.
14. In ay xoojiso hirgelinta iyo dhismaha kaabayaasha waxbarashada.
15. In ay ka hawlgasho aasaasidda macaahidda waxbarshada sare, taas oo saamaxaysa in la helo dad xirfad leh.
16. In ay bixiso adeegyo la siiyo dugsiyada dadka maskax ahaan iyo ama jidh ahaanba naafada ah.
17. In ay xoojiso kaalinta dhaqanka suubban ee dalkeennu ku leeyahay heerarka kala duwan ee laamaha waxbarashada.
18. Inay hirgeliso waxbarashada dhaqaalaha qoyska, dugsiyada farsamada iyo xirfadaha gaarka ah ee dumarka.
19. In ay isududo hawlaha sayniska iyo barnaamijyada cilmibaadhista qaranka.
20. In ay xaqiijiso in hawlaha cilmibaadhista loo fuliyo si waafaqsan baahida horumarineed ee dalka.
21. In ay fududeyso iskaashiga ka dhexeeya dugsiyada dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha cilmibaadhista, si kor loogu qaado cilmibaadhista iyo Horumarinta farsamada.
22. Inay iskuudubariddo oo taageerto ururrada fududaynaya hawlaha cilmibaadhista.
23. In ay dhiirrigeliso, isla markaana taageerto ururrada xirfadlayaasha iyo akademiyadaha gacan ka gaysan kara horumarinta sayniska iyo tiknoolajiyada.
24. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 41[aad]
## Wasaaradda Warfaafinta, Wacyigelinta Iyo Dhaqanka

Iyada oo ka duulaysa waajibaadka xukuumadda iyo muwaaddin kasta ka saaran adkaynta midnimada ummada, ilaalinta midnimada iyo difaaca dalka, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigelintu waa: -

1. Curinta iyo diyaarinta siyaasadaha, xeerarka iyo barnaamijyada warfaafinta dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahayba.
2. Maamulka, dabagalka iyo kormeerka hay'adaha warbaahinta ay xukuumadu leedahay.
3. Diyaarinta iyo hirgalinta siyaasadaha xukuumadda ee lagu horumarinayo warbaahinta dalka.
4. Dib u habaynta iyo dib u qiimaynta xeerarka iyo siyaasadaha dalka si loo helo xeerar si hufan u dammaanad qaada warbaahin xor ah.
5. Dammaanad qaadidda in la helo saxaafad xor ah oo ka duusha mabaadii'da Islaamka, qiyamka iyo hiddaha suubban ee ummadeena.
6. Horumarinta idaacadaha, wargeysyada, shabakadaha "internet" iyo muuqaal aragga "TV-ga" dawliga ah iyo kuwa madaxabannaanba.
7. Bixinta ruqsadaha warbaahinta gaarka loo leeyahay, si sharciga waafaqsan,



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD... FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

8. Dhiirrigelinta warbaahin xukuumadda iyo kuwa dadku wada leeyihiin, si loo helo warbaahin tayo leh oo xor ah.
9. Samaynta siyaasad guud oo kor loogu qaadayo wacyiga iyo heerka garaadka waddaniyadeed ee muwaaddiniinta reer Somaliland.
10. Inay muwaaddiniinta ku wacyigeliso, gudashada waajibaadka ka saaran bixinta cashuurta, ilaalinta deegaanka, dhawridda Dastuurka iyo xeerarka dalka.
11. Ku wacyigelinta muwaddiniinta jacaylka iyo difaaca dadka, diinta iyo dalka.
12. Abuuridda iyo qaabaynta ra'yi caamka bulshada, iyada oo lagu salaynayo dhaqanka suubban ee ummaddeena ee soojireenka ahaa, isla markaana, lagu baraarujinayo lagana wacyigeliyo caadooyinka iyo dhaqamada aan ku dhisnayn diinta Islaamka iyo dhaqankeenna.
13. Dejinta siyaasadda xukuumadda ee ku wajahan dhiirrigelinta, dhawridda iyo ilaalinta dhaqanka soojireenka ah ee dalka.
14. Iyada oo la dhawrayo aadaabta Islaamka, waxaa xil ka saaran yahay, horumarinta suugaanta iyo dhiirrigelinta hal-abuurka, fanka iyo ciyaaraha waddaniga ah.
15. Horumarinta hiddaha iyo dhaqanka suubban ee bulshada.
16. La dagaalanka iyo tirtiridda caadooyinka wax u dhimaya diinta, horumarka, dhaqanka iyo caafimaadka.
17. Samaynta iyo dhiirigelinta carwooyinka dhaqanka.
18. Ka hortagidda iyo u jawaabidda dagaalada warbaahineed ee dibadda ka soo waajaha Somaliland.
19. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

**Qodobka 42[aad]**
**Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga Ah**

Iyada oo ka duulaysa mabaadii'da arrimaha dibadda ee Dastuurka JSL, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Arimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ahi waa:

1. In ay dejiso siyaasadda arrimaha debadda ee Jamhuuriyada Somaliland.
2. In ay diyaariso qorshaha guud ee ictiraafka iyo ictiraaf raadinta JSL, isla markaana fuliso marka ay xukuumaddu u ansixiso.
3. In ay diyaariso qorshaha ictiraaf raadinta oo leh mudnaanta wajiyo ku salaysan urur goboleedyada sida IGAD, AU, EU, Arab, Islamic nations, IWM.
4. In ay horumariso, isla markaana joogtayso xidhiidhka iyo iskaashiga caalamiga ah iyo in ay adkayso xidhiidhka wanaagsan ee waddamada jaarka ah,
5. In ay ka talo siiso Madaxweynaha, Golaha Wasiirrada iyo Baarlammaanka Somaliland arrimaha diblamaasiyadda.
6. In ay qabato wadahadallada dawladaha shisheeye iyo hay'adaha caalamiga ah, iyada oo kaashanaysa wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee ay khusayso.
7. In ay qaabisho madaxda iyo wufuudda dawladaha kale iyo wakiilladooda, isla markaana habayso barnaamijyadooda, siisana adeegyo diblamaasiyadeed marka ay joogaan Somaliland.
8. Iyada oo kala tashanaysa hay'adaha ay khusayso, in ay kala xaajooto isla markaana saxeexdo heshiisyada Somaliland la gasho waddamada iyo ururrada caalamaga ah marka ay xukuumadu

u oggolaato, isla markaana ka hawlgasho ansixinta (retification) heshiisyadaas, marka laga reebo arrimaha ay xeerar kale awood u siinayaan hay'ado kale

9. In ay diiwaangaliso, isla markaana xafiddo dhammaan nuqullada heshiisyada ay Somaliland la gasho waddamada kale iyo hay'adaha caalamiga ah.
10. In ay xidhiidhiso, isla markaana dabagasho hawlaha diblamaasiyiinta iyo qunsuliyadaha Somaliland ee dawladaha iyo ururrada caalamiga ah.
11. In ay iskudubariddo xidhiidhada hay'adaha dawladdu la leeyihiin waddamada ajnabiga ah iyo ururrada caalamiga ah
12. In ay la xidhiidho diblamaasiyiinta shisheeye iyo wakiillada qunsuliyadaha ee ku sugan Somaliland iyo sidoo kale wakiillada hay'adaha caalamiga ah, si ay u fududayso ilaalinta danaha aynu wadaleenahay.
13. In ay xaqiijiso xasaanadda iyo mudnaanta ay leeyihiin diblamaasiyiinta shisheeye iyo wakiillada hay'adaha caalamiga ah ee ay dhigayaan heshiisyada ay Somaliland qayb ka tahay in la ixtiraamay.
14. Iyada oo la kaashanaysa hay'adaha ay khusayso in ay dhiirrigaliso ganacsiga debedda iyo dalxiiska, isla markaana soo jiidato in wadanka laga hirgaliyo maalgashiga shisheeyaha iyo sidoo kale in ay abaabusho helitaanka kaalmooyinka dhaqaale iyo farsamo.
15. In ay horumariso oo ay isla jaanqaadsiiso qorshayaasha looga golleeyahay helitaanka caawimmo dibadeed oo ay hesho Somaliland.
16. In ay xaqiijiso in danaha iyo xuquuqaha muwaaddiniinta Somaliland ee deggan debedaha la ilaaliyo, sidoo kalana in ay dhiirrigaliso, taageertana jaaliyadaha Somaliland.
17. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 43aad
## Wasaaradda Dhallinyarada Iyo Ciyaaraha

Iyada oo fulinaysa xilka xukuumadda ka saaran horumarinta iyo dhiirrigelinta ciyaaraha jidhka iyo isboortiga si loo helo dhallinyaro jidh ahaan iyo maskax ahaanba caafimaad qabta xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Dhaqanka, Dhalinyarada iyo Ciyaaruhu waa:

1. Dejinta siyaasadda iyo istaraatijiyadda xukuumadda ee ku wajahan dhallinyarada iyo ciyaaraha.
2. Qaabaynta qorshayaasha iyo barmaamijyada lagu dhiirigelinaayo laguna horumarinayo dhalinyarada iyo ciyaaraha Somaliland.
3. Isku xidhka iyo taageeridda ururrada ciyaaraha.
4. U abuuridda dhallinyarada xirfado shaqo iyo baaridda xirfadaha.
5. Dejinta iyo fulinta siyaasadda horumarinta dhallinyarada.
6. Isuduwidda hawlaha ku aaddan horumarinta iyo taakulaynta dhallinyarada.
7. Maamulka iyo horumarinta garoomada iyo xarumaha ciyaaraha.
8. Ka hortagga iyo ka wacyigelinta dhallinyarada caqabadaha ku waajahan waddanka gudihiisa sida tahriibka, shaqo la'aanta iyo balwadaha iyada oo kaashanaysa hay'adaha dawladda iyo kuwa caalamiga ahba.
9. Kor u qaadidda doorka dhallinyarada ee ka qayb qaadashada horumarka.
10. Ka qayb qaadashada hawlaha shaqo abuurka dhallinyarada.
11. Diyaarinta waxbarashada dadban ee dhalinayada.
12. Ka hortagga waxyaabaha keeni kara khataraha caafimaadka dhallinyarada.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

13. Isku xidhka dhallinyarada, ka hortagga dambiyada dhallinyarada iyo kooxaysiga.
14. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 44^aad
## Wasaaradda Isgaadhsiinta Iyo Teknoolajiyadda

Iyada oo la dhawrayo xuquuqda iyo xorriyaadka muwaaddiniinta ee isgaadhsiinta, isla markaana la fuliyo waajibaadka xukuumadda ka saaran sidii muwaddiniintu xuquuqdooda isgaadhsiineed ee dastuuriga ah ugu fududayn lahayd kafaa'iidaysigooda xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiintu waa:

1. In ay samayso, dejisana siyaasadda, iyo istiraatijiyadda xukuumadda iyo xeerarka lagu maamulayo isgaadhsiinta iyo teknoolajiyadda dalka islamarkaana lagu ilaalinayo xuquuqda iyo xoriyadda isgaadhsiinta muwaddiniinta.
2. In ay diyaariso hawlgalka maamulka iyo kormeerka qorshaha isgaadhsiineed ee dalka.
3. In ay ka qayb gaadato, curisana siyaasadaha la xidhiidha horumarinta teknoolajiyadda iyo isgaadhsiinta.
4. In ay dejiso qiimayaasha khidmadaha kala duwan ee laga qaadayo shirkadaha isgaadhsiinta ee ka hawl gala dalka, iyo xaqiijinta in la ururiyay khidmadahaas, iyaga oo la kaashanaya hay'adaha dawladda ee ay khusayso.
5. In ay kormeerto shirkadaha isgaadhsiinta, kuwa tignoolajiyadda isgaagsiinta iyo boosaha ee dalka iyo jaangoynta qiimayaasha adeegyada isgaadhsiineed.
6. In ay kobciso dakhliga iyo takaalifta ku waajibtay shirkadaha.
7. In ay horumariso aqoonta isgaadhsiineed iyo teknoolajiyadeed ee dalka iyada oo kaashanaysa Wasaaradda Waxbarshada Iyo Sayniska.
8. In ay maamusho hirarka dalka, samaysana lambarka dalka ku soo galka (country code).
9. In ay bixiso ruqsadaha adeegyada shirkadaha isgaadhsiineed ee ka hawlgalaya dalka iyo cusboonaysiinta ruqsadaha.
10. In ay maamusho xidhiidhka isgaadhsiineed ee ka dhexeeya isgaadhsiinta xukuumadda iyo ta gaarka ah.
11. In ay samayso barta isgaadhsiineed ee dawladda iyo diwaangalinta ciwaanadooda si kor loogu qaado isku xidhka iyo xog kala qaadashada hay'adaha dawladda;
12. In ay ka shaqayso sidii loo midayn lahaa kabayaasha adeegayada shirkadaha isgaadhsiinta ee gaarka loo leeyahay, si looga dhigo in qofku hal telefoon kawada waci karo dhammaan shirkadaha.
13. In ay ku tababarto hay'adaha kala duwan ee dawladda isticmaalka iyo adeegsiga nidaamyada isgaadhsiineed iyo teknoolajiyadeed ee casriga ah;
14. In ay horumariso siyaasadda guud ee isgadhsiinta iyo farsamada xogta keydinta casriga ah ee Somaliland.
15. In ay ilaaliso nidaamka xogta dawladda ee ku keydsan qalabka teknoolajiyadda, sida koombutarada IWM.

16. In ay samayso cilmibaadhisaha ku saabsan isgaadhsiinta iyo teknoolajiydda, si dalku ula jaan qaado caalamka.
17. In ay kormeerto, dabagashana fulinta iyo dhaqangelinta xeerarka isgaadhsiinta, siyaasadaha iyo qorshayaasha isgaadhsiinta dalka.
18. In ay dhexdhexaadiso, kala xadaysana xadgudubyada isticmaalka hirarka;
19. Wasaaraddu waxay dawladda wakiil uga tahay wax kasta oo la xidhiidha isgaadhsiin iyo teknoolajiyadda
20. In ay horumariso nidamiyada amniga xogta iyo ilallinta xogaha muwaaddintinka iyo hay'adaha dawladda si waafaqsan Xeerka Ilaalinta Iyo Dhawrista Xogta Jamhuuriyadda Somaliland
21. In ay xaqiijiso ilaalinta xogaha muwaaddintinta ee ay hayaan hay'adaha dawladdu.
22. In ay taageerto, dhiirrigaliso halabuurka tiknoolajiyadda, si loo kobciyo dhaqaalaha iyo shaqa abuurka dalka.
23. In ay gaadhsiiso adeegga boosaha, guud ahaan dalka oo dhan, una adeegto dawladda iyo shicibkaba.
24. Inay kor u qaado, horumariso, nidaamyada iyo adeegyada boosta, si waafaqsan halbeegyada caalamiga ah.
25. In ay qabato xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 45[aad]
## Wasaaradda Deegaanka Iyo Isbeddelka Cimilada

Iyada oo fulinaysa in mudnaan gaar ah la siiyo, Ilaalinta iyo fayaqabka deegaanka oo aasaas u ah caafimaadka bulshada iyo dhawrista khayraadka dalka, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Deegaanka iyo Iyo Isbeddelka Cimiladu waa:

1) Dejinta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo xeerarka xukuumadda ee la xidhiidha horumarinta deegaanka, isbedelka cimilda iyo la dagaalanka xaalufinta iyo nabaad guurka.
2) Dejinta qorshayaasha lagu horumarinayo deegaanka iyo kuwa lagaga hortagayo dhibaatooyinka deegaanka ee dabiiciga ah iyo kuwa dad sameega ahba.
3) Ka hawlgalida sidii looga midho dhalin lahaa ujeedooyinka deegaanka iyo isbedelka cimilda ee ku xusan dastuurka, siyaasadda deegaanka iyo qorsheyaasha kale ee qarankaba.
4) Ka hawl-gelidda sidii loo kala xadayn lahaa dhul daaqsimeedyada, seerayaasha, dhulka loo cayimay xoolo dhaqatada, dhulka loo isticmaalo biyo xidheenka, iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha kale ee ay khusayso si waafaqsan qodobka 16aad ee Xeer Lr. 69/2015.
5) Ka hawlgalida sidii looga hortagi lahaa xaalufka iyo nabaadguurka iyadoo ciidda iyo dhirtaba la daryeelayo, isla markaana la qorshaynayo habsami u isticmaalka dhul daaqsimeedka, iyadoo la kaashanaysa hay'adaha kale ee ay khusayso.
6) ka hawlgalidda sidii looga hortagi lahaa in laga sameeyo dhul daaqsimeedka degaamayn cusub ama tuulooyin looga golleeyahay in lagu hantiyo dhulka ka dhexeeya ummadda, iyadoo la kaashanaysa hay'adaha kale ee dawladda.
7) Ka hortagidda in la ooto dhuldaaqsimeedka, dhulka keymaha soolka ah, qadawga, dhul cawseedka (bananka), buuraha iyo sanaagooda iyo sidoo kale baabiinta dhulka sida sharcidarrada ah loo ootay, kaas oo aan waafaqsanayn xeerarka dalka.

8) soo qiimaynta iyo maamulka seerayaasha dawladda iyo sidoo kale u samaynta xuduudo calaamadaysan oo muuqda oo aan lagu xadgudbi Karin, si waafaqsan Xeerka Ilaalinta Keymaha Iyo Duurjoogta ee Xeer Lr. 69/2015.

9) Samaynta biyo qabatinno, si looga hortago nabaadguurka, carraguurka iyo jeexjeexyada ku yimaadda dhulka.

10) Dejinta iyo fulinta hab lagu qiimaynayo saamaynta deegaan ee ay yeelan karaan warshadaha iyo barnaamajyada hormarineed ee dalku;

11) Diyaarinta habab kor loogu qaadayo daryeelka deegaanka iyada oo la yaraynayo walxaha sunta ah ee deegaanka waxyeelaya ee ka dhasha farsamaynta alaabta iyo warshadaha.

12) Diyaarinta siyaasadda qaranka ee la xidhiidha isbeddelka cimilada, si ay gundhig ugu noqoto barnaamijyada iyo qorshaha Isbeddelka cimilada iyo la socodka hawlaha isbeddelka cimilada;

13) Xidhiidhinta iyo iskudubaridka barnaamijyada iyo mashaariicda lagaga hortagayo dhibaatooyinka isbeddedlka cimilada ee dhammaan hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn si loo xaqiijiyo ka midho dhalinta himillooyinka istiraatijiyadda iyo barnaamijka isbeddelka cimilada.

14) Daraasaynta iyo soo bandhigidda hindise cilmiyeed lagu qiimaynayo u nuglaanshaha isbeddelka cimilada iyo la qabsiga isbeddelka cimilada si looga hortago saamaynta ay ku yeelan karto bii'ada iyo nolosha bulshadaba.

15) Qabashada wacyigelin guud oo la xidhiidha Isbaddelka cimilada iyo saamaynta ay ku leedahay nolosha dadka iyo duunyadaba.

16) Diyaarinta iyo fulinta qorshayaal lagaga hortagayo saamaynta isbeddelka cimilada ee la xidhiidha xaalufka degaanka, biyo yaraanta, carraguurka, daadadka IWM.

17) Isuduwidda iyo ka war bixinta barnaamijyada iyo mashaariicda la xidhiidha isbadelka cimilada.

18) Dejinta qorshayaasha horumarinta deegaanka, iyo dhiirrigelinta si habboon u isticmaalka khayraadka dabiiciga ah, si aanay deegaanka dhibaato ugu iman.

19) Diyaarinta habka isku xidhka iyo ururinta xogta deegaanka iyo keydinta macluumaadka kala duwan ee ku saabsan deeganka.

20) Diyaarinta siyaasadaha iyo qorshayaasha lagaga hortagayo xaalufinta ugaadha iyo duurjoogta.

21) Ka hawgalidda sidii loo abuuri lahaa seerayaal iyo xerooyin lagu xanaaneeyo duurjoogta,

22) ku wacyi gelinta bulshada daryeelka duurjoogta iyo xayawaanka.

23) Ilaalinta iyo daryeelka dhirta iyo duurjoogta naadirka ku ah, ama kasii dabar go'aya dalkeenna (Endemic/rare species).

24) Samaynta qorshayaasha lagu cidhibtirayo dhuxulaysiga dhirta iyo ka ganacsigeedaba.

25) Diyaarinta qorshayaasha lagu beddelayo shidashada dhuxusha.

26) Iyo fulinta xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xilsaaraan Xeerarka dalku.

**Qodobka 46[aad]**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

### Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Difaaca Qaranka

Iyada oo laga duulayo waajibka xukuumadda ka saaran ilaalinta iyo difaaca madaxbannaanida dalka, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Gaashaandhigu waa:

1. In ay curiso xeerarka, siyaasadaha iyo isratijiyadaha difaaca dalka, isla markaana ka hawlgasho hirgalintooda.
2. In ay xaqiijiso difaaca xuduudaha dhuleed, badeed iyo cireed ee dalka JSL.
3. In ay diyaariso hirgalisana qorshayaasha difaaca qaranka.
4. Ilaalinta heshiisyada nabadda ee caalamiga ah iyo bixinta dammaanadda nabadda dadka kaddib marka ay ogolaansho ka hesho Madaxweynaha.
5. In ay ka hawlgasho qalabaynta iyo taageeridda Ciidanka Qaranka, si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo ee difaaca dalka.
6. In ay fuliso qorshayaasha iyo siyaadaha difaaca qaranka.
7. Maamulidda iyo diyaarinta miisaaniyadda Wasaaradda Gaashaandhiga, si waafaqsan xeerka maamulka maaliyadda.
8. In ay hoggaamiso qorshaha tababarka iyo tayaynta Ciidanka Qaranka.
9. In ay barnaamijyo waxbarasho oo debadeed si kor loogu qaado aqoonta saraakiisha iyo xubnaha Ciidanka Qaranka.
10. In ay dejiso qorshayaasha lagaga hortagayo duulaan kasta oo debadda kaga yimaadda qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.
11. In ka hawlgasho samatabixinta iyo bedbaadada dadka shacabka, marka ay dhacaan masiibooyinka dabiiciga ah, iyada oo adeegsanaysa Ciidanka Qaranka.
12. In ay kormeerto qiimaysana hubka iyo saanadaha ee Ciiddanka Qaranka.
13. In ay daryeesho, jihaysana naafadda Ciidanka Qaranka.
14. In ay gacansiiso booliska marka loo baahdo, si loo sugo amniga iyo kala danbaynta dalka.
15. Ladagaalanka cid kasta oo halis gelisa amniga iyo xasilloonida dalka.
16. In ay xaqiijiso shaqaalaysiinta, tababarka iyo abaabulka ciidamada keydka ah iyo kuwa cusub, marka xaalado dagaal la soo darsaan dalka.
17. In ay kala taliso Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland iyo Golaha Wasiirrada arrimaha gaashaandhiga iyo difaaca dalka.
18. In ay xaqiijiso in Ciidamada Qaranku ka qayb qaataan hormarka dalka
19. Qabashada xilal iyo waajibaad kasta oo xeerarka dalku ay u xil saaraan.

### Qodobka 47[aad]

### Wasaaradda Shaqada, Arrimaha Bulshada Iyo Qoyska

Iyada oo xukuumaddu fulinaysa xilka ka saaran horumarinta habka taakulaynta, caymiska iyo badbaadinta shaqaalaha iyo daryeelka qaybaha bulshada ee baylahsan, Wasaaradda Shaqada, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku waa:

1. In ay diyaariso siyaasadaha iyo xeerarka kala duwan ee la xidhiidha shaqo abuurka, xuquuqda shaqaalaha rayidka ah, arrimaha bulshada iyo qoyska.
2. In ay diwaangaliso shaqaalaha shirkadaha, hay'adaha waddaniga ah, kuwa caalamiga ah iyo kuwa waddaniga ah ee ha'yadaha qaramada midoobey.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. In ay faafiso, hubisana ku dhaqanka xeerarka la xidhiidha maamulka shaqaalaha rayidka, arrimaha bulshada iyo qoyska si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha iyo xuquuqda qoyska.
4. In ay ilaaliso, hubisana in fursadaha shaqo qorista hay'adaha iyo shirkadaha loo maray si sharciga waafaqsan.
5. In ay go'aamiso shuruudaha ogolaanshaha shaqada ee ajaanibka, bixinta ruqsadaha ogolaansha iyo dabagalka ku dhaqanka shuruudahaasi.
6. In ay xaliso khilaafaadka shaqo ee looshaqeeyaha iyo shaqaalaha aan dawliga ahayn ee diiwaangashan; (labor dispute).
7. In ay dhiirrigaliso waxbarashada iyo tababarada shaqaalaha rayidka ah, ayaga oo soo saaraya faafinayana siyaasado iyo istraatajiyad ku wajahan horumarinta waxbarashada ee shaqaalaha rayidka ah
8. In ay dhiirrigaliso abuurista iyo diiwangalinta ururo shaqaale oo rayid ah si waafaqsan xeerka shaqaalaha rayidka.
9. In ay habayso, gacanna siiso ururada shaqaalaha ee heer qaran.
10. In ay hubiso in si cadaalada iyo sinnaan ah loo qorey shaqaalaha ay ha'yadaha iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay qoranayaan, ayada oo xubin xafiiska shaqadu ka wakiil ahi goobjoog ka noqon doonto marka loo tartamayo shaqaaleynta shaqaalaha cusub.
11. In ay dejiso qorsheyaasha hormurineed ee la xidhiidha arrimaha bulshada guud ahaan, si loo horumariyo nolosha bulshada Somaliland.
12. In ay la dagaalanto tacadiyada ka dhanka ah haweenka iyo carruurta sida tacadiyada galmada ee haweenka loo gaysto, ka hortigga takooridda dadka nugul, ka hortigga iyo la dagaalanka tacadiyada jinsiga ah iyo shaqaalaynta carruuurta.
13. In ay xidhiidhiso hay'adaha ka hawl gala adeegga bulshada iyo dabagalka xilgudashadooda shaqo, si looga warbixiyo waxa ay waddanka ka qabtaan.
14. In ay dejiso, fulisana siyaasadda xukuumadda ee kuwajahan daryeelka, xanaanaynta, waxbarashada naafada, hooyada, dhalaanka iyo dadka aan xiskoodu dhammayn ee aan lahayn awood iyo cid kafaalo qaadata.
15. In ay taakulayso ilaalisana xuquuqda dumarka, carruurta iyo dhammaan dadka nugul.
16. In ay maamusho, dabagashana xarumaha dhaqancelinta iyo daryeelka carruurta.
17. In ay dawladda kala taliso arrimaha la xidhiidha hormurinta arrimaha bulshada iyo samaanta qoyska Somaliland.
18. In ay kor u qaado heerka nololeed ee dadka baahiyaha gaarka ah qaba, sida dadka laxaadka la', carruurta tabaalaysan iyo I.W.M
19. In ay ka hortagto wax kasta oo dhibaato u keenaya nolosha bulsho iyo ta qoys ee bulshadeena Somaliland.
**20.** In ay gudato xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay siiyaan Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah, ka qoyska ama xeerarka kale ee dalku.

**Qodobka 48$^{aad}$**
**Wasaaradda Cadaaladda**

Iyada oo la fulinayo waajibaadka xukuumadda ka saaran sugidda xuquuqaha iyo xorriyadaha Dastuurku dammaanadqaaday, meelmarinta ku dhaqanka sharciga (rule of law), horumarinta adeegyada cadaaladeed iyo xaqiijinta u sinnaanteeda xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Cadaaladdu waa:

1. In ay dejiso siyaasadaha qaran ee lagu horumarinayo, laguna tayaynayo adeegyada cadaaladeed, sidoo kalana kala shaqayso bahda cadaaladda meelmarinta siyasadahaas iyo la socodka shaqadooda.
2. In ay xidhiidhiso, horumarinta hay'adaha bixiya adeegyada cadaaladeed iyo ku ilaalinta gudashada xilkooda ama ka warbixinta xilgudashadooda.
3. In ay qiimayso waxqabadka iyo ka warhaynta dhibaatooyinka haysta ama la soo dersa hay'adaha bahda cadaaladda, sidoo kalana ka talabixiso sida wax looga qaban karo, ugana war bixiso Madaxweynaha iyo goleyaasha kale ee qaran.
4. In ay xaqiijiso kor u qaadista fursad u helidda cadaaladda iyo xaqiijinta u sinnaanteeda.
5. Qiimaynta, isuduwidda, kormeeridda iyo tayaynta adeegyada kaalmada sharci iyo hubinta helitaankooda ee dadka u baahan ee aan kharashyada adeegyadaa iska bixin karin.
6. In ay fuliso go'aannada maamul ee guddida cadaaladda.
7. In ay ku baraarujiso hay'adaha bahda cadaaladda xaaladaha khilaafsan xuquuqda iyo xoriyaadka dastuuriga ah.
8. In ay bixiso ruqsadaha mihnadlayaasha sharciga (legal professionals) iyo horumarintooda.
9. In ay bixiso ruqsadaha nootaayooyinka, sidoo kalana kormeerto dabagashana nootaayooyinka dalka, si sharciga waafaqsan.
10. In ay xaqiijiso ixtiraamidda, ilaalinta iyo dhawrista xuquuqaha aasaasiga ah iyo xorriyadaha dastuuriga ah.
11. In ay ka warhayso xaaladda guud ee cadaaladda dalka, soona diyaariso barnaamijyada iyo qorshayaasha lagu horumarinayo hay'adaha bixiya adeegyada cadaaladeed iyadoo lala tashanayo madaxda hay'adahaas.
12. In ay xaqiijiso dejinta nidaamka xabsiyayn oo la jaanqaadaya Dastuurk JSL, qawaaniinta caalamiga ah iyo heerarka tayo ee guud ahaan la aqoonsan yahay.
13. Inay kor u qaaddo akhlaaqda iyo xirfadaha maxaabiista dalka, si ay ugu soo noqdaan bulshada iyaga oo yeeshay dhaqan suubban, iyada oo la kaashanaysa hay'adaha kale ee xukuumadda.
14. In ay ku wacyigeliso dadweynaha xuquuqdooda iyo waajibaadyadooda.
15. In ay horumariso shuruucda dalka sida xeerarka uu adeegsado garsoorku, iyadoo latashanaysa hay'adaha kale ee dawladda.
16. In ay daraasayso sababaha dembiyada, qorshaynta hababka iyo nidaamyada lagaga hortagayo, sidoo kalana isku xidho hay'adaha khuseeya iyo bulshada sidii loo habayn lahaa kahortagga dembiyada.
17. In ay qabato codsiyada shisheeye ee lagu doonayo soo celinta dembiile iyo kuwa lagu doonayo aqoonsiga xukunnada ciqaabeed ee shisheeye iyo in ay u dirto codsiyo noocaas oo kale ah hay'adaha dhiggeeda ah ee dawlad shisheeye, kaddib marka ay hay'adaha ku shaqada leh ka hesho qoraallo dhammaystiran oo arrimahaas la xidhiidha.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · OFFICIAL · SOLICITOR GENERAL

18. In ay qabato oo ka go'aan gaadho codsiyada shisheeye ee lagu doonayo soo wareejinta maxbuus xukumman oo ku xidhan Somaliland una dhashay ama xidhiidh dhaw la leh dalkaa shisheeye, sidoo kalana u dirto codsiyo kuwaa la mid ah dawlad shisheeye oo ay ku codsanayso u soo wareejinta Somaliland maxbuus xukumman oo ku xidhan dalkaa shisheeye una dhashay ama xidhiidh dhaw la leh Somaliland.
19. Iyo xilka iyo waajibaadka kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 49aad
## Wasaaradda Xidhiidhka Golayaasha iyo Arrimaha Dastuurka

Iyada oo la xoojinayo xidhiidhka wada shaqayneed ee dastuuriga ah, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Xidhiidhka Golayaasha & Arrimaha Dastuurku, waxay yeelanaysaa awooddahan iyo shaqooyinka soo socda:

1. Inay ka shaqayso iskuxidhka iyo wada shaqaynta Golaha Xukuumadda iyo Golayaasha Xeerdejinta (Guurtida iyo Wakiillada).
2. Inay ka shaqayso sidii loo meelmarin lahaa hawlaha xukuumadda ee horyaal Golayaasha Xeerdejinta.
3. Inay kala taliso Madaxweynaha arrimaha ku saabsan xidhiidhka Golayaasha Xeerdejinta, xeerarka kaga yimaadda Golayaasha Xeerdejinta iyo arrimaha Dastuurka.
4. Inay ka shaqayso isuduwidda hawlaha lagamamaarmaanka u ah ansixinta madaxda sare ee xukuumadda ee Madaxwaynuhu magacaabo ee u baahan ansixinta Golaha Wakiillada.
5. Inay u diyaarso Madaxweynaha iyo Golaha Wasiirrada warbixinta arrimaha ka soo baxa Golayaasha Xeerdejinta ee ay uga baahan yihiin xukuumadda.
6. Inay diyaariso una gudbiso Golayaasha Xeerdejinta qabyaqoraallada xeerarka ka soo gudba Golaha Wasiirrada.
7. Isuduwidda hawlaha shaqo ee xukuumadda kaga xidhma Golayaasha Xeerdejinta.
8. Inay diyaariso qorshaha qaran ee dib u eegista Dastuurka, si loo qabyatiro Dastuurka Somaliland, iyadoo kala tashanaysa hay'adaha ay khusayso.
9. Inay qabato kulamo lagu lafagurayo qabyatirka iyo dib u habaynta Dastuurka JSL.
10. Inay diyaariso warbixinaha qorshaha qaran ee dib u eegista Dastuurka, isla markaana u gudbiso Madaxweynaha warbixinahaas.
11. Inay fuliso, isla markaana meel mariso qorshaha qaran ee dib u eegista Dastuurka kaddib marka loo ansixiyo.
12. Fulinta xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay siiyaan xeerarka kale ee dalku.

## Qodobka 50aad

**Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda**

Iyadoo gudanaysa xilka xukuumadda ka saaran horumarinta kalluumaysiga iyo ka fa'iidaysiga khayraadka badda, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Kaluumaysiga iyo iyo Kheyraadka Badda, wuxuu noqonayaa sidan hoos ku xusan:

1) Dejinta siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha ku saabsan horumarinta, ilaalinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadka kalluumaysiga iyo kormeeridda fulintooda.
2) Soo diyaarinta xeernidaamiyayaasha iyo habraacyada lagu horumarinaayo kalluumaysiga iyo khayraadka badda, sidoo kalana lagu hirgelinayo xeerka kalluumaysiga JSL;
3) Bixinta ruqsadaha kalluumaysiga ee maraakiibta kalluumaysiga shisheeye iyo kuwa waddaniga ah, si wafaqsa xeerka kalluumaysiga iyo xeer-nidaamiayayaasha ka farcama;
4) Dhiirrigelinta iyo horumarinta nidaamka dhaqaale ee fursadaha maalgashiga iyo suuqgaynta ganacsiga kalluumaysiga dalka gudihiisa iyo ganacsiga kalluumaysiga dalka debaddiisa loo dhoofiyo;
5) Dhiirrigelinta maalgashiga waxsoosaarka khayraadka badda iyo kalluumaysiga, si uu maalagashigaasi uga qayb qaato koboca dhaqaalaha bulshada ku nool xeebaha dalka.
6) Dhiirrigelinta horumarka tignoolajiyadda la xidhiidha kalluumaysiga, si loo horumariyo iyo tirada waxsoosaarka kalluumaysiga.
7) Kobcinta iyo xoojinta hannaanka farsamo ee lagu hormariyo xirfadaha kalluumaysatada iyo iskaashatooyinka ku hawlan waxsoosaarka kalluunka, si kor loogu qaado waxsoosaarka kalluunka.
8) Xidhiidhinta hay'adaha maxaliga ah iyo kuwa heer caalami ee ku hawlan horumarinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadka kalluunka iyada oo la siinaayo taageero farsamo.
9) Dejinta iyo hirgelinta nidaam lagu xakamaynayo isla markaana lagaga hortagayo kalluumaysiga sharcidarrada ah.
10) Dhiirrigelinta habka dhaqan ee kalluumaysiga iyo diyaarinta halbeegyo la xidhiidha farriimaha wacyigelinta bulshada ee waxsoosaarka kalluumaysiga iyo ka faa'iidaysiga kheyraadka badda.
11) Dardargelinta horumarka dhaqaale ee bulshada ku nool xeebaha iyada oo loo marayo ku jihaynta waxsoosaarka iyo ka faa'iidaysiga kalluumaysiga iyo kheyraadka badda;
12) Ilaalinta iyo daryeelka noolaha badda ee ku nool goobaha seerayaasha keydka badda ee ay ku dhalaan ayna dhigtaan ugxanta noolaha baddu iyo dhagxaanta shacaabiga xeebaha dalka ee hoyga u ah dhir iyo kalluun ay qaar ka mid ahi naadir ku yihiin dunida.
13) Diyaarinta warbixin cilmiyeedyo la xidhiidha kalluumaysiga iyo heerka kaluumaysiga dalka taasoo wax ka taraysa horumarinta heerka kalluumaysiga dalka.
14) Daraasaynta iyo ururinta macluumaadka kheyraadka badda, kalluumeysiga iyo faafinta macluumaadka noocyada kala duwan ee kalluunka iyo khayraadka badda.
15) Samaynta cilmibaadhis la xidhiidha kalluumaysiga iyo noolaha kale ee kheyraadka badda.
16) Qiimaynta iyo la socodka fulinta siyaasadaha ku saabsan ilaalinta, maaraynta iyo ka faa'iidaysiga dhammaan kheyraadka kalluumaysiga, si waafaqsan Xeerka Kalluumayiga JSL.
17) Xaqiijinta noolaha badda iyo kheyraadka xeebaha laga ilaaliyo wax kasta oo khatar gelin kara.
18) Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 51aad
## Wasaaradda Qorshaynta Iyo Horumarinta Qaranka

Waxa xukuumadda xil ka saaranyahay, diyaar garaynta iyo dabagalka qorshe horumarineed oo dhammaystiran oo ah mid dhaqaale iyo bulsho, diyaar garaynta iyo dhiirrigelinta maalgashiga dalka JSL, si taas loo gaadhana xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Qorshayntu waa:

1. Inay soo bandhigto qorshayaal iyo istiraajiyado horumarineed oo awood u leh xaqiijinta yoolka fog, si looga xusho qorshaha habboon iyada oo laga duulayo hadba xaalada taagan.
2. Inay dejiso qorshaha muddada dhow oo ku salaysan ka muddada dheer, kaas oo summad u yeelaya ujeeddooyinka la higsanayo muddada fog isla markaana koobsanaysa dhinacyada dhaqaale iyo bulsho ee mujtamaca, isla markaana habaynaya awoodda bulshada.
3. Inay diyaariso qorshe sannadle ah oo ka duulaya heerarka adeegyada bulshadu taagnaayeen (baseline) xilliga diyaargaraynta qorshaha iyadoo laga duulayo qorshaha muddada dhexe.
4. Inay isududo mashaariicda horumarineed ee ay maalgaliyaan qaadhaan bixiyayaashu.
5. Inay tirakoobto kheyraadyada xoolaha, beeraha, waxsoosarka warshadaha iyo kaabayaasha dhaqaalaha ee dalka.
6. Inay diyaariso warbixinaha tirakoobka (staatistigiska) xaaladaha bulshada, dhaqaalaha iyo deegaanka dalka ee sannadlaha ah.
7. Inay daraasayso, soona bandhigto xaaladaha dhaqandhaqaale ee bulshada.
8. Inay xoojiso, adkaysana iskaashiga horumarinta dhaqaalaha ee Somaliland iyo waddamada deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha caalamiga ah.
9. Inay kormeerto, dabagashana mashaariicda horumaruneed, si loo xaqiijiyo in qorshayaasha loo fuliyey si hufan oo isla xisaabtan leh.
10. In ay qiimayso mashaariicda horumarineed marka ay dhammaadaan iyo diyaarinta war bixinnadooda.
11. Inay daraasayso carqaladaha (caqabadaha) soo wajihi kara qorshaha horumarineed iyo ku talagalkooda.
12. Inay kormeerto dabagashana qorshaha horumarinta ee sannadlaha ah, kana war bixiso wax qabadka la sameeyey, waxqabadka aan qabsoomin, caqabadaha ka soo baxay meelmarinta qorshaha sannadlaha ah, sidoo kalana ka tala bixiso tallaabooyinka ku habboon ee lagaga gudbi karo wixii goldaloolooyin ah ee soo baxay, si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka qorshaha muddada dhow.
13. Inay diiwaangaliso hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee dalka ka hawlgalaya kuna dabagasho fulinta mashaariicda.
14. Iyo xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 52aad
## Wasaaradda Duulista Hawada iyo Horumarinta Madaarrada

Iyada oo xukuumadda xil ka saaran yahay in kor loo qaado **adeegga** ganacsiga duulista madaniga ah iyo soojiidashada maalgashiga duulista madaniga ah, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Duulista, Hawadda Iyo Horumarinta Madaarradu waa:

1. Wasaaraddu, iyada oo uga wakiil ah xukuumadda, waxay leedahay masuuliyadda samaynta siyaasado iyo istiraajiyado lagu hagayo, laguna horumarinayo duulista hawada iyo horumarinta madaarrada Jamhuuriyadda Somaliland, si waafaqsan Xeer Lr.70/2017;



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
JAARIIDADA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Dejinta siyaasadda iyo horumarinta saadaasha hawadda ee duulimaadyada.
3. Dejinta qorshayaal lagu hormarinaayo madaarrada.
4. Maamulka gaadiidka cirka ee ka goosha ama ka ganacsada JSL.
5. Curinta shuruucda lagu maamulo goobaha diyaaraduhu ka gooshaan iyo horumarintooda.
6. Samaynta siyaasado iyo istiraatijiyado lagu hagayo, laguna horumarinayo duulista hawada Jamhuuriyadda Somaliland
7. Xaqiijinta in si habboon loo ilaaliyey bedqabka iyo amniga ganacsiga hawada iyo horumarinta danta guud,
8. Hoggaamінta duulista hawada ee Somaliland gudaheeda.
9. Horumarinta iyo kor u qaadidda sumcadda iyo adeegga madaarrada.
10. Dardargelinta maamulka iyo habsami u socodka hawlaha adeegyada madaarrada dalka.
11. Hoggaaminta, horumarinta iyo sii joogtaynta hannaan gaadiidka cirka ah.
12. Kobcinta nidaamin wanaagsan oo cad, kaas oo ka jawaabi kara baahida dadweynaha.
13. Saxeeexidda heshiisyada caalamiga ah ee duulimaadyada haawada, si waafaqsan xeerka iyo qorshaha horumarinta qaranka.
14. Curinta habraacyada lagu maamulayo bixinta ruqsadaha oggolaanshaha hawlgalnimada diyaaradaha ra'yidka ah (civil aircraft), goobaha shidaalka iyo dayactirka (fuel & maintenance facilities) iyo ansixinta khidmadaha adeegyada madaarrada, sicirka horumarinta (development fees), khidmadda adeega rakaabka, si waafaqsan Xeer Lr.70/2017;
15. Qiimaynta iyo korjoogtaynta waafaqsanaanta siyaasadaha, habraacyada iyo miqiyaasyada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee shirkaddaha diyaaradaha ee ka ganacsada hawada Somaliland iyo goobaha keydinta shidaalka iyo adeegyada dayactirka diyaaradaha.
16. Curinta habraacyada iyo siyaasadaha lagu maamulayo adeegyada ganacsi ee hawada, bedqabka nafta iyo agabka, ilaalinta xuquuqaha macmiilka, xadgudubyada ay ku kici karaan shirkaddaha iyo qaybaha ku lugta leh adeegyada hawada IWM.
17. Xidhiidhinta xafiisyada ku lugta leh maamulida isticmaalka hawada ee ra'yid iyo ciidanba.
18. Hubinta bedqabka diyaaradaha ka hawlgalaya hawada Somaliland iyo waafaqsanaanta miqiyaasyada caalamiga ah ee u degsan diyaaradaha.
19. Dejinta miqiyaasyada amniga hawada Somaliland oo waafaqsan lifaaqa 17aad ee Xeerka Maamulka Hawada Caalamiga ah (Chicago Convension) oo loo raacayo maamulka madaarrada, shirkadaha diyaaradaha iyo xafiisyada qaabilsan amniga iyo bedqabka.
20. Hubinta iyo korjoogtaynta fulinta siyaasadaha iyo miqiyaasyada caalamiga ah ee u degsan maamulka hawada ee heer qaran iyo kuwa caalamiga ahba.
21. Dejinta siyaasadaha iyo xeernidaamiyayaasha hawlgelinta, gacan ku haynta, horumarinta iyo maamulidda garoomada diyaaradaha, si waafaqsan Xeerka Duulista Hawada.
22. Dhisidda iyo casriyaynta madaarrada Jamhuuriyadda Somaliland, si ay ula jaanqaadaan madaarrada caalamiga ah.
23. Hoggaaminta iyo korjoogtaynta (supervising) horumarinta shabakadda gaadiidka cirka Somaliland oo dhaqaale ahaan shaqayn kara (economically viable) kaas oo kobciya horumarka dhaqaale ee gudaha iyo midka heer gobolba.
24. Dibu'eegista siyaasadaha iyo miqiyaasyada dejisan ee lagu maamulayo adeegyada hawada.



OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

25. Korjoogtaynta iyo kormeeridda horumarka iyo hawlgudashada hay'adda duulista madaniga ah ee Somaliland, si ay u buuxiso shuruudaha sharcigani uga baahan yahay iyo waafaqidda heerarka caalamiga ah iyo samaynta siyaasado, si loo aasaaso hannaan duuliseed oo dhaqaale ahaan xoog ah.
26. Dejinta siyaasadaha, qorshayaasha iyo habraacyada ay ku shaqaynayso hayadda duulista madaniga ahi, si waafaqsan Xeer Lr: 70/2017.
27. Hoggaamninta iyo horumarinta madaarrada Somaliland.
28. Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 53aad
## Wasaaradda Diinta Iyo Awqaafta

Iyada oo laga duulayo qodobka 5aad ee Dastuurka JSL oo jidaynaya xilka ka saaran xukuumadda in aan geyiga Somaliland lagu faafin diin ka baxsan Diinta Islaamka, ka hortegidda fisqiga iyo anshax xumada iyo xaqiijinta sidii xeerarka dalka loogu salayn lahaa shareecadda Islaamka islamarkaana loo ilaalin lahaa awqaafta, xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Diinta iyo Awqaaftu waa:

1. Inay kala taliso xukuumadda arrimaha ku saabsan Diinta iyo Shareecadda Islaamka.
2. Inay xaqiijiso inaan diin kale lagu faafin dalka JSL.
3. Inay ka hortagto habdhaqannada ka baxsan diinta iyo dhaqanka suubban ee umadda JSL.
4. Inay maamusho, kor joogtaysana hawlaha xajka.
5. Inay diyaariso imaamada masaajidada, korna u qaado wacyigooda.
6. Inay diiwaangaliso imaamada masaajidada.
7. Inay wanaaga iyo samaha dadka farto xumaha iyo fisqigana ka reebto.
8. Inay maamusho gacantana ku hayso waqafka ma guurtada ah iyo ku dhiirrigelinta bulshada hawlaha waqfiga iyo samafalka.
9. Inay dhiirrigeliso xifdiga quraanka iyo culuumtiisa.
10. Inay taageerto, horumarisana malcaamadaha iyo xarumaha lagu barto culuumta diinta Islaamka.
11. Inay dhiirrigeliso dhisidda masaajidada, maamulkooda iyo maamulidda dhulka danta guud ee loo jaro masaajidada iyo malcaamadaha.
12. Inay kor u qaado shacaa'irta islaamka iyo dhawristooda.
13. Inay ka hortagto in dalka la soo geliyo ama laga abuuro fisqi iyo wixii wax u dhimaya dhaqanka Islaamka.
14. Inay kor u qaaddo xidhiidhka hay'adaha islaamiga ah iyo isku xidhkooda.
15. Inay ku dhawaaqdo ilaalisana maalmaha Ramadaanta, ciidaha iyo maalmaha kale ee diiniga ah.
16. Inay ka hortagto in kooxaha fidiya waxa lagu tilmaamo diimaha ee ka baxsan Diinta Islaamka dalka soo galaan ama wax soo geliyaan.
17. Inay soo saarto fatwooyinka rasmiga ah iyo dejinta halbeegyada lagu maamulayo gawraca xoolaha.
18. Inay midayso manaahiijta mac-hadyada diiniga ah iyo malcaamadaha waddanka.
19. Inay curiso Xeerka Diiwaanka Sekada oo si hufan u qaabeeya nidaamka ururrinta iyo maamulka sakada iyo sidoo kale nidaamka u qaybinta dadka ay shareecada Islaamku u xaddiday in la siiyo, si waafaqsan qodobka 12aad faqraddiisa 7aad ee Dastuurka JSL.

20. Inay ku wacyigeliso bulshada axkaamta sekada, sida maalka ay sekadu ku waajibto (nisaab), shuruudaha iyo axkaamta sekada, qaybaha maalka iyo noocyada maalka ay sekadu ku waajibto IWM.
21. Inay ku wacyigeliso bulshada in sekadu tahay hannaan maaliyadeed oo Islaami ah, taas oo ah waajib la xidhiidha in qofku ka bixiyo hantidiisa qaddarka sekada ah ee ku waajibay.
22. Inay ku wacyigeliso bulshada ahmiyadda sekada iyo sida sekada oo la bixiyaa u daahirinayso, kordhinayso oo u barakaynayso hantida qofka muslimka ah.
23. Inay kala taliso Madaxweynaha nidaamka iyo talooyinka lagu hirgelinayo ama lagu taabbagaliyo Sanduuqa Sekada.
24. Inay dabagasho oo la socoto mashaariicda awqaafta danta guud ah ee ay hay'adaha islaamiga ahi ka hirgeliyaan dalka.
25. Inay dejiso siyaasadaha awqaafta, cilaajyada diiniga ah, madaarista iyo masaajidada dalka.
26. Inay soo daabacdo isla markaana u qaybiso hay'adaha dawladda iyo bulshadaba musxafka Kitaabka Quraanka Kariimka ah.
27. Inay ilaaliso sidoo kalana daryeesho xabaalaha dalka, iyadoo la kaashanaysa dawladaha hoose ee dalka.
28. Iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Caddaaladda inay bixiso barnaamijyo lagu dhisayo wacyiga iyo aqoonta diinta islaamka ee maxaabiista dalka, si loogu baraarujiyo inay ka dheeraadaan xumaha iyo fisqiga, si ay ugu soo noqdaan bulshada iyaga oo yeeshay dhaqan suubban, sida uu dhigayo qodobka 27aad faqraddiisa 8aad ee Dastuurka JSL.
29. Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## Qodobka 54aad
## Wasaaradda Dib u dejinta iyo Arrimaha Bani aadantinnimada

Wasaaradda dib u dejinta iyo Arrimaha Bani aadantinnimada Jamhuuriyadda Somaliland waxay yeelanaysaa awoodahan iyo shaqooyinkan soo socda:

1. In ay curiso xeerarka, siyaasadaha iyo qorshayaasha iyo mashaariicda la xidhiidha barakacayaasha iyo qoxoontiga soo noqonaya, iyada oo la kaashanaysa hay'adaha dawladda iyo hay'adaha kale ee khuseeya.
2. Inay xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland uga masuul noqoto maamulka iyo maaraynta hawlaha dib u dejinta qaxoontiga dadka reer Somaliland ee dalka dib ugu soo noqonaya iyo dadka ku barakaca gudaha Somaliland.
3. In ay xidhiidhiso kaalmooyinka iyo deeqaha barakacayaasha ee hay'adaha dawladda, kuwa maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ahba.
4. Inay Isududo hawlaha samafalka lacagaha taakulada bulshada iyo lacagaha gargaarka bini aadamtinnimo ee degdegga ah, si loogu qorsheeyo hannaan keeni kara ka soo kabasho degdeg ah, loogana gaadho natiijo wax ku ool ah oo la taaban karo.
5. Iany qiimeyso xaaladda degaannada ay ku nool yihiin dadka barakacayaasha ee u baahan in la gaadhsiiyo lacagaha taakulada ah ama lacagaha gargaarka bani'aadannimo ee degdegga ah, sidoo

kalana diyaariso qorshaha lacagaha taakulada ah ee la gaadhsiinayo dadka ku nool goobaha barakacayaasha iyo dadka qaxoontiga ah,

6. Inay qiimeyso dabagashana mashaariicda lacagaha taakulada ah iyo gargaarka bani'aadannimo ee la gaadhsiiyo muwaaddiniinta ku nool goobaha barakacayaasha, sidoo kalana xaqiijiso in gargaarkaasi si sax ah u gaadheen dadkii loogu talagalay ee ku noolaa goobaha barakacayaasha, iyo saamaynta ay ku yeelatay nolosha bulshada.
7. Inay xaqiijiso in qorshaha lacagaha taakulada ah ee lagu daryeelayo muwaaddiniinta ku nool goobaha barakacaashu ay noqdaan kuwo dib loogu dhisayo nolosha dadka barakacayaasha ah, dibna loogu dejinayo goobihii ay ka soo barakeceen, balse aanay noqon kuwo abuuraya goobo barakayaal rasmi ah iyo degsiimooyin cusub oo abuuri kara nabadgelyo darro, sidoo kalana keeni kara ku tiirsanaan joogto ah oo caqabad ku noqon karta noloshii bulshada iyo waxsoosaarkii dalka.
8. Inay diyaariso warbixinta mashaariicda lacagaha taakulada ah ee la gaadhsiiyo dadka ku nool goobaha barakacayaasha iyo dadka qaxoontiga ah, warbixintaasi oo faahfaahinaysa deegaannada iyo tirada dadka la gaadhsiiyay, nooca lacagaha, natiijada laga gaadhay iyo caqabadaha lagala kulmay, haddiiba ay jiraan, isla markaana u Madaxweynaha.
9. Inay jaanngoyso qaabka ay noqonayso lacagaha taakulada ah ee la gaadhsiinayo dadka ku nool goobaha barakacayaasha, sida haddii ay lacagtaasi tahay mid si shuruud la'aan ah lagu siiyo dadka "Unconditional Cash Transfer"ama ay tahay mid shuruudo leh "Conditional Cash Transfer" ama ay tahay mid lagu xoolaynayo (Restocking), ama lagu siinayo beero xidhis ama raashin I.W.M. Kaddibna u gudbiso guddida si ay usoo ansixiyaan.
10. In ay qiimayso, sidoo kalana dabagal ku samayso mashaariicda dib u dejinta iyo kaalmooyinka loo fidiyo muwaaddiniinta qoxoontiga ah ee dalka ku soo laabanaya iyada oo la raacayo heshiisyada iyo xeerarka dalka ee khuseeya.
11. In ay kormeerto fulinta siyaasadaha iyo qorshayaasha qaran iyo kuwa caalamiga ah ee la'xidhiidha dhawrista iyo daryeelka dadka magangelyo doonka iyo qaxoontiga ah
12. In ay dawladda kala taliyaan siyaasadaha iyo xeerarka la xidhiidha arrimaha magangalyo doonka iyo qaxoontiga.
13. In ay dhawrto ilaalisana xuquuqda dadka magangalyo doonka iyo qaxootiga.
14. In ay ka shaqayso daryeelka dadka magangalyo doonka iyo qaxootiga.
15. In ay dejiso isla markaana diyaariso siyaasadaha iyo qorshayaasha qaran ee la xidhiidha daryeelka magangalyo doonka iyo qaxootiga.
16. In ay fuliso isla markaana meelmariso siyaasadaha iyo qorshayaasha qaran iyo kuwa caalamiga ah ee la xidhiidha dhawrista iyo daryeelka dadka magangalyo doonka ah iyo qaxootiga.
17. In ay dejiso qorshayaasha iyo siyaasadaha la'xidhiidha isdhexgalka iyo kor u qaadista wadanoolaanshaha bulshada qaxoontiga ah iyo bulshada ay ku dhex nool yihiin.
18. In ay kor u qaaddo kana qayb qaadato iskaashiga heer gobol iyo caalami ee maaraynta iyo xal u helidda dhibaatooyinka dadka magangalyo doonka ah iyo qaxootiga iyada oo metelaysa dalka Jamhuuriyadda Somaliland.
19. In ay diwaangaliso keydisana xogta dadka magangalyo doonka ah iyo qaxoontiga.
20. In ay diyaariso keydisana warbixinnada khuseeya qaxootiga iyo Magangelyo doonka.

21. In ay qabato codsiyada la xidhiidha dalbashada qaxootinnimada iyo magangalyo doonka.
22. In ay samayso kaadhadhka aqoonsiga qaxootinnimo iyo warqadaha Magangelyo doonka.
23. In ay fuliso go'aamada Guddida Qaran ee Go'aan ka Gaadhista Arrimaha qaxootiga iyo magangalyo doonka.
24. Iyo xilka iyo waajibaadka kale e ay u xilsaaraan xeerarka dalku.

## QAYBTA SADDEXAAD
## QAABDHISMEEDKA WASARADAHA

### Qodobka 55aad
### Qaabdhismeedka Wasaaradaha

Qaabdhismeedka wasaaraduhu, wuxuu ka kooban yahay xafiiska wasiirka, wasiir kuxegeenka, wasiirudawlaha, agaasimaha guud iyo madax waaxeedyada iyo qaybaha kale ee loo baahdo.

### Qodobka 56aad
### Xafiiska Wasiirka

Xafiiska wasiirku wuxuu ka kooban yahay xafiiska wasiirka, xafiiska wasiirudawlaha, xafiiska wasiir kuxigeenka iyo lataliyayaasha wasiirka.

### Qodobka 57aad
### Agaasimaha Guud

Haddaan xeer si kale u dhigin, wasaaradd kastaa waxa ay yeelanaysaa agaasinka guud oo ay soo hoos galayaan waaxda qorshaynta iyo tirakoobka (statistics), waaxda maamulka iyo maaliyadda iyo waaxaha kale ee wasaaraddu u baahato.

### Qodobka 58aad
### Aasaasidda Xafiisyada Heer Gobol

Xafiisyada heer gobol ee wasaaradda marka ay lagamamaarmaan noqoto waxa lagu aasaasayaa xeer wasiir.

### Qodobka 59aad
### Mas'uuliyiinta Xafiisyada Heer Gobol

Xafiisyada heer gobol waxa kamasuul ka noqonaya Isuduwayaasha heer gobol ee wasaaradaha.

### Qodobka 60aad
### Kormeeridda Xafiisyada Heer Gobol

Kormeeridda shaqada xafiisyada heer gobol waxaa ka masuul ah agaasimaha guud ee wasaaradda ama hay'adda xukuumadda ee uu xafiisku hoostago.

### Qodobka 61aad
### Qaybaha iyo Shaqaalaha Xafiisyada Heer Gobol

Xafiisyada heer gobol waxay yeelanayaan qaybaha iyo shaqaalaha lagama maarmaanka u ah

### Qodobka 62aad
### Xilka Xafiisyada Heer Gobol

Xafiiska Heer Gobol wuxuu:

1. Fuliyaa xeerarka, siyaasadaha, mashaariicda iyo barnaamijyada Wasaaradda ama hay'adda uu wakiilka ka yahay.
2. Iyada oo si hufan oo tayo leh uu u qabanayo, wuxuu siiyaa dadka gobolka adeegyada heer gobol ee wasaaradda ama hay'adda uu wakiilka ka yahay qabato.
3. Wuxuu isku xidhaa wasaaradda ama hay'adda uu ka wakiilka yahay iyo kuwa la gudboon ee heer gobol iyo maamulka gobolka.
4. Fuliyaa xilka iyo waajibaadka kale ee madaxada wasaaradda ama hay'adda uu wakiilka ka yahay u xilsaaro.
5. Xafiisyada heer gobol waxa la aasaasayaa mar kasta oo ay lagamamaarmaan noqoto.
6. Waxaanu masuul ka yahey shaqaalaha degmooyinka jooga kormeerkooda iyo mushaharkooda.

## Qodobka 63[aad]
## Xilka iyo Waajibaadka Isuduwayaasha Gobollada

Isuduwayaasha gobolladu waxa ay: -

1. Fuliyaan awoodaha iyo xilka xafiiska ee heer gobol.
2. Ka masuul yihiin maamulka, qorshaynta iyo hagidda hawlaha xafiiska.
3. Si waafaqsan xeerka shaqaalaha u anshaxmariyaa shaqaalaha heer gobol ee hay'addaha ay wakiilka ka yihiin.
4. Oggolaadaan fasax, xanuunka, umusha iyo maqnaanshiiyaha aan lacagta la hayn iyo fasaxyada rasmiga ah ee shaqaalaha heer gobol.
5. Diyaargaraynta odoraska miisaaniyadda ee heer gobol,
6. Ansixinta dalabka iibsiga qalabka xafiisyada ee gobolka isaga oo ka duulaya miisaaniyadda loo ansixiyay.
7. Ka gorgortanka, gelidda iyo saxeexa heshiisyada adeegga, iibka ee gobolka kuwaas oo qiimahoodu ka badnayn afar milyan (4 000 000) oo Somaliland shillin ah.
8. Ka go'aan gaadhaan cabashooyinka xaga xuquuqda ee shaqaalaha gobolka.
9. Ka go'aan gaadhaan codsiyada gunnada shaqada dheeraadka ah.
10. Kor u qaadan wadashaqaynta ka dhexeysa xafiisyada hay'adaha Xukuumadda ee kale ee heer gobol iyo xafiiska hay'adda uu wakiilka ka yahay.
11. Go'aaminta safarrada shaqada ee gobolka dhexdiisa iyada oo mudadda safarka ee gobolka dhexdiisa ka badnaan karin tobon maalmood.
12. Go'aaminta ka qaybgalka shaqaalaha ee shirarka, aqoon isweydaarsiyada iyo tababarrada heer gobol.
13. Shaqooyinka kale ee xeer u xilsaaray ama masuul ka sarreeyaa u igmaday.

## Qodobka 64[aad]
## Kormeerka iyo dibu'eegista Talaabooyinka Isuduwayaasha

Awoodaha isuduwayaasha ee ku xusan qodobka sare iska hortaagi maayaan wasiirka/guddoomiyaha/maareeyaha inuu dib u eego waxkabeddelo, laalo, tallaabo kasta oo uu qaaday isuduwe, sidoo kale wuxuu iskubeddeli karaa isuduwayaasha gobollada.

## Qodobka 65[aad]
## Hay'adaha Xukuumadda



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

1. Iyada oo laga duulayo qodobka 113aad ee Dastuurka, hay'adaha waxa loola jeedaa guddiyada (komishanada), xafiisyada iyo mu'asasad kasta oo kale oo fulineed oo aan ahayn Golaha Wasiirrada, wakaaladaha, shirkadaha iyo mashaariicda.
2. Hay'aduhu waxay leeyihiin jiritaan qaanuuni ah oo waafaqsan qodobka 53aad ee Xeerka Madaniga, marka aan sidaas si kasoo horjeedda si cad loogu qeexin xeerka lagu aasasay.
3. Madexweynaha Jamhuuriyadda Somaliland isaga oo la tashanaaya cidda ay khusayso waxa uu dhisi karaa hay'ado madaxbannaan oo loo xilsaaro hawlo gaar ah.

### Qodobka 66aad
### Xeerka Aasaasidda

1. Mid kasta oo ka mid ah hay'adaha waa in xeerkeedda lagu aasaasayay ku cadaadaan arrimaha ku dhigan xeerkan, islamarkaana waa in loo aasaasaa si waafaqsan xeerkan.
2. Xeerka hay'adda waa in lagu sheegaa magaca hay'adda, dabeecadeedda, ujeeddooyinka loo aasasay, waajibaadkeeda iyo xilkeeda, awooddaha hay'adda, maaliyadda, wasaaradda kormeerka ku leh, qaabdhismeedkeeda, iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah.
3. Hay'adaha madaxabannaan waxa la'abuuri karaa oo keliya marka uu ka horreeyo xeer lagu aasaasay.

### Qodobka 67aad
### Madaxbannaanida Hay'adaha

1. Xeerka lagu aasaasay hay'adda waa in lagu sheegaa heerka madaxbannaani ee ay leedahay inta uu gaadhsiisan yahay.
2. Heerka madaxbanaanidu wuxuu noqon karaa mid hawlgudasho iyo mid maaliyadeed.

## QAYBTA AFRAAD
## QAABDHISMEEDKA HAY'ADAHA

### Qodobka 68aad
### Qaabdhismeedka Hay'adaha

1. Xeerka lagu aasaasayo hay'adda waa in lagu sheegaa qaabdhismeedka hay'adda, iyada oo si cad loogu qeexayo inay leedahay guddi latalineed (advisory Board) ama guddi agaasin ama in aanay lahayn iyada oo la eegayo dabciga hay'adda.
2. Waa waajib in hay'adaha leh guddi agaasin (komishanada) ay yeeshaan guddi agaasin oo ka kooban tiro haldheeri ah.
3. Qayb kasta oo ka mid ah hay'adda waa in xilkeeda, waajibaadkeeda iyo awoodaheeda si cad loogu qeexaa xeerka lagu aasaasayo.

### Qodobka 69aad
### Ujeeddooyinka Hay'adaha

Iyada oo ay hay'ad kastaa leedahay ujeeddo u gaar ah oo ku dhisan dabcigeeda, hay'ad kastaa waxa ay yeelanaysaa ujeeddooyinkan soo socda:

1. In hay'ad kastaa adkayso kaalinta ay ku leedahay horumarinta maamulka, siyaasadda iyo dhaqaalaha dalka, maaddaama ay tahay qayb aan sinna uga bixi karin nidaamka maamul, siyaasadda iyo dhaqaale ee dalka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Inay u hawlgasho qabashada adeegyada ugu muhiimsan iyo horumarintooda iyada oo ka duulaysa mabda' ah soo celinta kharashka iyo xaqiijinta soo hoynta miisaaniyadda dheeraadka ah iyada oo ku xaqiijinaysa tartanka ganacsi ee xorta ah gudaha iyo debeddaba.
3. Ujeeddo kasta oo ay keensatay dabeecadda hay'ada oo la xidhiidha hawsha loo abuuray.

**Qodobka 70aad**
**Awoodaha Hay'adaha**

Ka sokow awoodaha lagu xusay xeerka aasaasidda, hay'ad kastaa, si ay u xaqiijiso ujeeddooyinkeeda, waxa ay leedahay awooddaha soo socda:

1) In ay qaaddo tallaabooyin kasta oo lagu xaqiijiyay ujeeddooyinkeedii loo abuuray, iyada oo dhawraysa xeerka.
2) Hawlgelinta iyo qaadashada shaqaalaha lagama maarmaanka u ah xilgudashadeeda, iyada oo xeerka shaqaalaha la raacayo.
3) In marka ay hesho oggalaanshiiyaha cidda ay khusaysaa laamo ka furato dalka gudihiisa iyo debeddiisaba, markay lagama maarmaan u noqoto hawlgudashadeeda.
4) Diyaar garaynta mashaariic horumarineed.

**Qodobka 71aad**
**Masuuliyadda Hay'adda**

Hay'ad kastaa waxa ay si toos ah uga masuul tahay in ay si wanaagsan u gudato una maamusho xilkeeda, iyada oo qaadday tallaabooyin lagu ilaalinayo danta guud islamarkaana raacaysa sharciga dalka.

**Qodobka 72aad**
**Maaliyadda iyo Hab xisaabeedka**

1. Hay'addu waxay ka furan kartaa lambar xisaabeed loo adeegsanayo lacagta dalka ama mid kaleba baannanka dalka.
2. Hay'ad kasta waa in qaab xisaabeedkeedu ahaado mid sax ah oo hufan isla markaana ay ka muuqato dakhliga iyo kharashkaba, taas oo ku salaysan hannaan xisaabeedka dalka.
3. Hay'ad kastaa waa in ay ku ekaataa miisaniyad sannadeedka, isla markaana haddaan loogu oggolaan qoraal aanay madaxna u wareejin madax kale.
4. Hay'ad kastaa waa in ay xisaabxidh saddex bilood ah u gudbiso Wasaaradda Maaliyadda iyo Hantidhawraha Guud.
5. Hay'ad kastaa waxay yeelanaysaa qayb u qaabilsan xisaabaadka.

**Qodobka 73aad**
**Adeegsiga Miisaniyadda Hay'adda**

1. Misaaniyadda hay'adda waxaa loo adeegsanayaa si loo gaadho ujeeddooyinka hay'adda.
2. Iyada oo aan waxba loo dhimin qodobka hore miisaaniyadda hay'adda waxaa loo adeegsanayaa hawlaha hoos ku qoran.

b. Maamulka hay'adda iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah fulinta xilkeeda.
t. Bixinta waajibaadka maaliyadeed ee hay'adda
j. Maalgelinta mashaariicda horumarineed ee lagu ansixiyay miisaniyadda



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

x. Bixinta mushaharka, gunnooyinka iyo wixii kale ee xeerka miisaaniyadda loogu oggolaaday.

3. Waxa reebban haddaan loo ogolaan in ay hay'addu u isticmaasho maaliyad hawlaheeda.

   b. Ku iibsasho dhul ama dhisid

   t. Ku tasarrufka hadhaaga iyo faa'iidada markay jiraan.

4. Waxa hay'ad ku waajib ah:

   i. In loo abuuro xisaab gaar ah wixii burburay ama labeddelay, mana bannaana ku tasarrufkeedu in loo adeegsado ujeeddooyin gaar ah oo ka baxsan kuwii loogu talagalay.

ii. In loo maalgaliyo sida ugu faa'iidada badan

iii. In laga jaro diiwaanka alaabta ku dhammaatay isticmaalka ama qiimo beeshay.

## Qodobka 74aad
## Xisaab Celinta

Hay'ad kastaa waa inay samaysaa xisaab celin sannadle ah oo ay u gudbinayso Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawraha Guud.

## Qodobka 75aad
## Xisaabxidhka

1. Waxa ku waajib ah hay'adda inay samayso xisaabxidh lix biloodle ah oo ay ku xusan tahay: -

   b. Caddaynta xisaabxidhka iyo hadhaaga, haddii uu jiro

   t. Warbixinta Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawraha Guud.

2. Warbixinada xilli –laha ah ee wax qabadka iyo habsami uu socodka hawlaha hay'adda ee sannad maaliyadeeddka iyo qorshehawleed keeda sannadka danbe

## Qodobka 76aad
## Amaahda

Ma bannaana inay hay'addu amaahato wax ka badan kharashka miisaaniyadda ugu jira haddaanu Madaxweynuhu oggolaan.

## Qodobka 77aad
## Go'aannada Hay'adaha

1) Hay'addu waxay muddo 30 maalmood gudahooda kaga go'aan gaadhaysaa cabashooyinka loo soo gudbiyay, waana in qoraal lagu siiyo cidda danaynaysa, waxaana looga racfaan qaadan karaa Maxkamada Sare, muddo aan ka badnayn soddon maalmood oo ka bilaabanta maalinta la siiyo go'aanka cidda danaynaysa.
2) Amarrada ama go'aan kasta oo kasoo baxa hay'adaha oo khilaafsan Dastuurka ama xeerarka dalka, waxa darafka ka cabanaaya u gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh, muddo soddon maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta qoraalku soo baxay ama ay gaadhay cidda uu cusleeyay go'aanka amarku.

## Qodobka 78aad
## Warbixinaha

1. Hay'ad kasta waxa ku waajib ah inay samayso warbixin sannadle ah oo ay u gudbinayso Madaxweynaha ama wasiirka, iyada oo ku sheegaysa wixii u qabsoomay, waxa u qorsheysan, tallaabooyinka muhiimka ah ee ay qaadeen iyo wixii kale ee Madaxweynuhu amro.

2. Haya'ddu waxay sidoo kale u gudbinaysaa warbixin, mar kasta oo uu Madaxweynuhu ama wasiirku sidaas amro ama ay ula muuqato hay'adda inay habboon tahay.

## QAYBTA SHANAAD
## WAKAALADAHA

### Qodobka 79aad
### Wakaaladdaha

1. Wakaaladdu waa qayba aasaasi ah oo si gaara loogu xilsaaro shaqo muhiim ah oo waxsoosaar leh, waxaana lagu xidhiidhayaa wasaarad ka mid ah wasaaradaha dalka.
2. Iyada oo wakaaladuhu la wadaagaan hay'adaha axkaamta ku dhigan qaybta shanaad ee xeerkan, qodobadan soo socda waxa lagu dhaqayaa wakaaladaha

### Qodobka 80aad
### Xilka iyo Waajibaadka Wakaaladda.

1. Wakaaladdu waxay:

b. Dhaqangalinaysaa siyaasadda guud iyo mashaariicda horumarineed ee wasaaradda wixii ka khuseeya.

t. Fulinaysaa qorshayaasha iyo barnaamijyada wakaalad ee ku salaysan qorshaha iyo siyaasadda wasaaradda, qaybta ka khusaysa.

j. Dejinaysa halbeegyada shaqada wakaaladda, si waafaqsan qorshaha iyo barnaamijyada wasaaradda qaybta ka khusaysa.

2. Wakaalad kasta waxa ka madax noqonaya maareeye guud, kaas oo yeelan kara mid iyo in ka badan oo kuxigeenno ah.
3. Wakaalad kastaa waxay yeelan kartaa waaxaha kala ah qorshaynta iyo tirokoobka, maamulka, maaliyadda iyo waaxaha kale ee ay u baahato

### Qodobka 81aad
### Xilka iyo Waajibaadka Maareeyayaasha

1. Maareeyayaasha ama madaxdu waxa ay fuliyaan xilka wakaaladda/xafiiska shuruucda xeerhoosaadyada iyo maamulkooda.
2. Maareeyuhu wuxuu leeyahay ansixinta, magacaabista saraakiisha wakaaladda, kaddib marka uu helo go'aanka guddida qiimaynta iyo anshaxmarinta oo waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Xukuumadda.

### Qodobka 82aad
### Xilka Maareeye Kuxigeennada

Maareeye Kuxigeenku wuxuu:

1. Ka caawiyaa maareeyaha xilgudashadooda sida xeerka ama xeerhoosaadyadu dhigayaan.
2. Iyada oo aan waxba loo dhimin xilka maareeye kuxigeenka, maareeyuhu wuxuu u xilsaari karaa kuxigeenkiisa hoggaaminta, waax ka mid ah waaxaha maamulka ee wakaaladda, iyada oo aanu ku yeelanayn gunno dheeraad ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Wuxuu maareeyuhu saraakiisha maamulka ama shaqaalaha wakaaladda u diri karaa shaqo dheeraad ah, haddaanay jirin xeerar ka reebaya ama aanay ka hor imanayn xilkiisa xeerku qeexay.

## QAYBTA LIXAAD
## SHIRKADAHA IYO MASHAARIICDA XUKUUMADDA
### Qodobka 83aad
### Shirkadaha Xukuumaddu Leedahay Ama wax ku leedahay

1. Shirkadda xukuumaddu leedahay ama wax ku leedahay waata ay yeelanayso xukuumaddu ugu yaraan saddex dalool oo meel saamiyada shirkadda, waxaana la hoosgeynayaa wasaaraadda ku habboon ee ay leeyihiin wada shaqayn la xidhiidha xaga shaqada, siyaasadda iyo mashaariicda
2. Shirkadaha waxa lagu xidhayaa wasaaradd ka mid ah wasaaraddaha dalka.
3. Waxay wasiirka ay khusayso u gudbinayaan xisaabxidhkooda muddo aan ka badnayn 30 maalmood, marka laga bilaabo maalinta xisaab xidhsannadeedka.
4. Shirkaduhu waxay ku sii shaqaynayaan miisaaniyaddii hore inta xisaabxidhku dhammaanayo, shirkad kasta oo isbixinwayda sannad maaliyadeedkeeda waxa lagu soo rogayaa sannad maaliyadeedkeeda kormeer gacan ku hayn

### Qodobka 84aad
### Warshadaha iyo Mashaariicda Madaxabannaan

Xukuumaddu waxay yeelan kartaa warshado iyo mashaariic madaxbannaan oo leh jiritaan qaanuuni ah, waxaana lagu dhaqayaa cutubkan khuseeya wakaaladaha iyagoo yeelan doona guddi latalineed

## QAYBTA TODDOBAAD
## XIDHIIDHKA MAAMUL EE WASAARADAHA, HAY'ADAHA IYO WAKAALADAHA

### Qodobka 85aad
### Xidhiidhka Maamul Ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha Xukuumadda iyo Wakaaladaha

Xidhiidhka maamul xeerkan gudihiisa waxa looga jeedaa:

1. Kormeer: oo ah awoodda:
   i. Wasaaraduhu ku leeyihiinhay'adaha, wakaaladaha iyo shirkadaha hoos imanaya ama ku xidhan, taas oo la xidhiidha kormeerka hawl fulintooda waxqabadkooda, iyada oo aan la faro gelinaynayn hawl maalmeedkooda.
   ii. Helidda warbixinnada shaqada, maaliyadda, qiimaynta la socodka siyaasadda, halbeegyada iyo tilmaamaha guud ee xukuumadda, baabi'inta ku xadgudubka maamulka, awoodda iyo ansixinta odoraska miisaaniyadda.
   iii. Lagu kala hormarinaayo oo mudnaanta lagu kala siinayo qorshayaasha
2. Kor-jogtayn maamul oo ah awoodda masuul (administrative supervision) ku hagi karo xilgudashada madaxda ka hoosaysa, isla markaana kaga joojinayo gefafka maamul isaga

oo dib ugu eegi kara talaabooyinka uu qaatay, si uu u saxo go'aamadiisa ama ku laalikaro ama wax kaga beddeli karo go'aamada ku xigeenka.

3. Waxa reebban in kormeer maamul gaadhsiisnaado:

b. Magacaabid haddaan looga soo racfaan qaadan dib u eegidda, laalidda, waxkabeddelka go'aannadooda aan ka baxsanayn awooddaha masuuliyiinta go'aan ka qaatay.

4. Kormeerka wasaaradi ku leedahay hay'ad,wakaalad ama shirkad waxa reebban in uu gaadhsiisnaado heshiisyada ay gashay hay'addu, wakaladdu ama shirkaddu haddaanay dhaafin xuduuddeeda

## Qodobka 86aad
## Bixinta xogta

Waxay wasaaraddu xaq ugu leedahay hay'adaha, wakaaladaha iyo shirkadaha hoos yimaadda Ina ay u gudbiyaan xogta ay u baahan tahay iyo cadaymaha la xidhiidha.

## Qodobka 87aad
## Dambiyada iyo Ciqaabaha

Hay'adda, wakaaladda iyo shirkad kasta oo wasaaradda ay hoos timaado u gudbin wayda xogta iyo xisaabaadka xeerkani dhigay, waxa ay wasaaraddu ku soo rogi kartaa:

1. in aanay helin kordhin misaaniyadeed.
2. Inay xayirto lambarrada xisaabta ee hay'adda, wakaaladda ama shirkadda iyo hantideeda, inta ay soo gudbinayaan xisaabxidhka laga rabo
3. Ina ay Madaxweynaha iyo Golaha Wasiirrada kula taliso in hay'addaas, wakaaladdaas ama shirkaddaas la baabiiyo.
4. In wasiirku u gudbiyo xeer-ilaalinta, kaddib marka uu helo oggolaanshaha Madaxweynaha, codsi amar qabasho oo lid ku ah madaxada, wakaaladda, shirkadda ama sarkaal kasta oo wasaaradda iska hortaaga ama ka qariyey xog la xidhiidha xisaabaadka iyo hawlaha hay'adda, wakaaladda ama shirkadda oo ay dalbatay ama meel ka dhac kasta oo la xidhidha tallaabo kasta oo khilaafsan xeerka oo la qaatay.

## Qodobka 87aad
## Xalinta Isqabadka Hay'adaha Xukuumadda

1. Isqabad kasta oo ka dhex abuurma xukuumadda iyo hay'adaheeda, wakaaladaheeda iyo shirkadeheeda lana xidhiidha xil, waajibaad, awood ama khilaaf sharci, waxaa lagu xalinayaa si waafaqsan xeerkan.
2. Marka isqabadkaas ay xalin kari waayaan, cidda ay dhexmartay waa in ay u gudbiyaan Madaxweynaha.

# QAYBTA SIDEEDDAAD
## Hab-dhaqanka iyo Waxyaabaha ka Reeban Madaxda Hay'addaha

## Qodobka 88aad
## Habdhaqanka Saraakiisha Xukuumadda



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

Dhammaan shaqaalaha iyo saraakiisha xukuumadda waxa ku waajib ah in ay raacaan Xeerka Anshaxa ee Hay'adda Shaqaalaha.

**Qodobka 89aad**

**Waxyaabaha ka Reebbanaan kara Madaxda Hay'adaha**

1. Sarkaal ama shaqaale xukuumadeed, si toos ah ama si dadban uma iibsan karo hanti loo xaraashayo cashuur xukuumadeed, ajuuro ama adeeg Xukuumadeed.
2. Madaxda hay'adaha, wakaaladaha, shirkadaha iyo mashaariicda Xukuumadda, marka laga reebo xubnaha Golaha Wasiirradda, waxa ka reebban in ay si uun ugu lug yeeshaan siyaasadda.
3. Waxa ka reebban madaxda, hay'adda, wakaaladaheeda, shirkadaheeda iyo mashaariicdeeda shaqo kasta oo ka baxsan ta xukuumadda ee loo igmadday.

**Qodobka 90aad**

**Daacadnimada Masuuliyiinta**

Masuulka ama shaqaalahu waxa ay xilli kasta daacad u noqonayaan isla markaana hiil iyo hoo Isla garab taagayaan xukuumadda qof u haya Somaliland xil ama u qaban kara dal kale xil.

**Qodobka 91aad**

**Sheegida iyo Soo Bandhigidda Hantida iyo Masuuliyadda**

1. Marka saraakiisha ama shaqaalaha xukuumaddu ay qabanayaan xil xafiis ama xili kasta oo xeer tilmaamo, waxa ku waajib ah in ay cidda ay khusayso, iyaga oo dhaarsan u gudbiyaan hantidooda iyo maslaxad kasta oo ay ku leeyihiin ama ka masuul yihiin oo xidhiidh la leh shaqada.
2. Habraaca diiwaangelinta waxa loo raacayaa xeer gaar ah.

**Qodobka 92aad**

**Wufuudda Xukuumadda**

1. Masuuliyiinta xukuumadda ee dalka wafti ahaan ku metelikaraa waa:

b. Madaxweynaha.

t. Madaxweyne Kuxigeenka.

j. Xubnaha Golaha Wasiirrada.

Kh. Madaxda hay'adaha iyo wakaaladaha.

d. Agaasimayaasha guud.

2. Habka wufuudda waxa loo raacayaa nidaamka habmaamuus ee ay dejiso Wasaaradda Arimaha Debedda iyo Xidhiidhka Caalamiga ahi.

**Qodobka 93aad**

**Awoodda Dhaarinta iyo Amarrada Yeedhmada**

Marka cid aan ahayn garsoore, xeer ujideeyo dhegaysiga ama qaadista caddayn, wuxuu awood u leeyaay dhaarinta cidda uu ka qaadayo caddaynta, soo saarista yeedhmo qoraal ah ama amar soo gudbinta qoraallo

**Qodobka 94aad**

**Igmashada Awoodda**

1. Iyada oo mid kasta oo madaxda xukuumadda, hay'adaheeda, wakaaladaheeda iyo shirkadaheedu masuul ka yahay xilka iyo awoodaha loo igmaday hay'addiisa, wakaalladdiisa ama shirkaddiisa, waxa u bannaan in qayb ka mid ah awooddiisa u igman karo agaasimayaasha iyo isuduwayaasha gobollada, hadday lagamamaarmaan u tahay fulinta xeerarka, siyaasadda iyo qorshayaasha hay'adda, wakaaladda ama shirkadda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Iyada oo aan waxba loo dhimayn faqradda hore ee qodobkan, waxaa reebban igmasho kasta oo aan qoraal ahayn, isla markaana la xaddidin mawduuceeda iyo cidda loo igmaday.

## Qodobka 95aad
## Buuxinta Jagada Banaanaata

Jagada ku bannaanaata geeri, iscasilaad, xilkaqaadis, waxa si ku meelgaadh ah loogu magacaabayaa cid xilka siihaysa, iyada oo magacaabista loo marayo habkii uu ku yimid masuulka hore. Waxaase reebban in si rasmiy ah cid loogu magacaabo xilkaa inta aanu dhammaan fasaxa sarkaalkii hore hadii uu jiro, haddaanay jirin duruuf degdega ah oo keensanaysa magacaabis degdeg ah.

## Qodobka 96aad
## Kusimidda Masuulka

Marka si aan joogto ahayn uu u maqnaado ama xilkiisa u gudan kari waayo agaasime waaxeed ama ruux shaqaale ahi, sarkaalka ka sarreeyaa isaga oo raacaya xeerarka wuxuu u magacaabayaa xilkiisii sarkaal ama shaqaale kale, hadba sida ay tahay oo aan ka baxsanayn waaxdiisa, si uu u qabto shaqadiisii.

## Qodobka 97aad
## Masuuliyadda Xukuumadda ee ku aaddan Falalka Saraakiisha Xukuumadda

1. Hay'adaha xukuumadeed waxa ay ka masuul yihiin falalka masuuliyiinta metelaa u qaadeen, si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka u yaalla.
2. Hay'adda xukuumadeed kama masuul aha gefafka ka dhasha taxadar darrada, niyad xumida ama jebinta xeerarka, tilmaamaha iyo go'aannada.

# QAYBTA SAGAALAAD
# WARBIXINAHA IYO XUSUUS-DHAWRKA

## Qodobka 98aad
## Warbixinnada Rasmiga ah

Madaxda wasaaradaha, hay'adaha xukuumadda, wakaaladaha iyo shirkadahu waxay diyaar garaynayaan isla markaana u gudbinayaan Madaxweynaha warbixin sannadle ah, inta ka horraysa bisha koowaad ee sannad walba.

## Qodobka 99aad
## Jaangoynta Nuxurka Warbixinta

Nuxurka warbixin sannadeedka waxa lagu jaangoynaa Xeer Madaxweyne

## Qodobka 100aad
## Warbixinnada Gaarka ah

Sarkaal kastaa waxa uu diyaargaraynayaa warbixin gaar ah oo la xidhiidha shaqada uu masuulku ka yahay, mar kasta oo Madaxweynaha ama masuulka ka sarreeyaa ka dalbado.

## Qodobka 101aad
## Nuqullada Rasmiga ah

Mid ka mid ah nuqullada rasmiga ah ee warbixinnada waxa loo gudbinayaa xarunta xusuus-dhawrka xukuumadda, waxaana fursad loo siinayaa dadweynaha inay helikaraan.

## Qodobka 102aad
## Warbixinnada Gudaha

1. Maareeyayaasha iyo agaasimayaashuba waxa ay u gudbinayaan wasiirkooda warbixin sannadle ah oo ay ku xusan yihiin, waxqabadka, warbixinta maaliyadeed, qorshayaasha, talabixinnadooda, carqaladaha iyo xeerarka ama wareegtooyinka loo baahan yahay.
2. Warbixinnadu waa in ay koobsadaan waxyaabaha u qabsoomay iyo qiimaynta inta horumar laga gaadhay qorshayaashii la ansaxiyey, taas oo ay weheliso warbixintii maaliyadda oo muujinaysa kharashaadkii sannadka, dakhliga, soo jeedimaha, talabixinnada iyo qorshahawleedka sannadka xiga oo ay ku jiraan xeerarka iyo wareegtooyinka lagamamaarmaanka ah

## Qodobka 103aad
## Xusuus-dhawrka

1. Mid kasta oo ka mid ah wasaaradaha, hay'adaha iyo wakaaladahu waxa ay yeelanayaan xafiiska xusuus-dhawrka oo yeelanaya diiwaan u gaar ah oo lagu keydiyo laguna qoro go'aannada kama dambaysta ah, amarada, wareegtooyinka, xeerhoosaadyada, heshiisyada ka soo baxa ama loo soo diro.
2. Mar kasta oo khilaaf ka dhashana waxa lagaga go'aan gaadhayaa taariikhda iyo xilliga la diiwaangeliyey

## Qodobka 104aaad
## Summada iyo Tirooyinka Qoraallada

Qoraal kasta waxa lagu soo saarayaa summad iyo lambar u gaar ah oo sannad walba ka bilaabma lambar kow.

# QAYBTA TOBNAAD
## Qodobbo Kala Duwan

## Qodobka 105aad
## Xilliga kala Guurka

1. Iyada oo xeerkani aasaas iyo dhisme u yahay wasaaraddaha, qaabdhismeedkooda, habka iyo hannaankooda xilgudasho, waxaa Xeer Madaxweyne ku soo saaray Madaxweynaha.
2. Iyada oo aan la eegayn axkaamta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, Madaxweynuhu waxa uu wax ka beddeli karaa dhismaha wasaaradaha, waxaanu qaabdhismeedkooda, habka iyo hannaankooda xilgudasho ku soo saari karaa Xeer Madaxweyne, si waafaqsan qodobka 18aad ee xeerkan.



XAFIISKA ... RASMIGA

3. Hay'ad iyo wakaalad kasta oo aan lahayn xeer aasaasid, waa in muddo lixbilood gudahood ah oo ka bilaabanta marka uu dhaqangalo xeerkani loogu sameeyaa xeerka aasaasida.
4. Hay'adda ama wakaaladaha leh, xeer lagu aasaasay, laakiin xeerkoodu aanu la jaanqadi karin xeerkan, waa in muddo lix bilood gudahood ah oo ka bilaabanta marka xeerku ku soo baxo faafinta rasmiga ah, lagu waafajiyaa xeerkan.

**Qodobka 106aad**
**Laalis**

Waxa xeerkan lagu laalay qodobbada uu xeerkani ku sameeyay wax ka beddelka iyo kabista ee ku jiray Xeerka Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxabannaan ee XeerLr.71/2015.

**Qodobka 107aad**
**Awoodda Soo saarista Xeernidaamiyayaal**

Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay soo saarista xeernidaamiyayaal lagu dhaqangelinayo xeerkan.

**Qodobka 108aad**
**Dhaqangalka Xeerka**

Xeerkani waxa uu dhaqangalayaa marka uu Baarlamaanku (Wakiillada iyo Guurtida) ansixiyo, Madaxweynuhuna saxeexo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

______________________

**Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

______________________